

SHANDARANLEY

“Waxay ahayd goor gabal dhac ah. Waxa godka shalam tidhi cadceedda oo

baradho u eg, kana gondo degtay oo caraabeheeda ku sii gelbiyey lingaxa falaadho sagal guduud ah, dhulka laftiisa ayaa gucumada sagalka cirka ku sharfay lingaxa galbeedna kaga suntay hariiryo sidbaaq guduudan.

Xilligu waa diriradii gu’nimo, oo ay laamaha dhirtu si layaab leh u leeg leegsanayaan, cosobka tabaadi noqday caleentuna hawrtay ayaa dhulka cadrisay. Jihada bari waxa dhirta baarkeeda ka soo fuuray dayax dhool qarsaday, oo ka run sheegay suuradda lagu yaqaan bil saddex iyo toban jirsatay, waana bisha loo yaqaan candhoqoys. Waxa isna I arka yidhi xiddigga Xamar islegdey oo aalaaba xili roobaadka isku beega xundhurta cirka. Raxan raxan caraabe ah, oo baalaley ah ayaa mashquul ka dhigtay jiho kasta oo aad eegto. Ugaadha cawo darranta ka leedaynaysa iyo duurjoogto kala nooc nooc ah ayaa hareeraha ka dhaafaysa oday goodaad oo

Salaad maqrib ku tukanaya bog-cad burciid xallani ku goglan tahay. Oday goodaad salaamad-naqsi ka dib markii uu geesta bidix jaleecay ayuu isha ku dhuftay nirgo dayrcad u badan oo afdhuubyaalaynaya meel qoor ah,

waxaana ugu horeeyey qurbac midabkiisu yahay madaw bacad ah, oo intuu

kurusku yuubmay nirgaha la shamal qaadaya neecowda macaan ee burcada

lebihawle. Goodaad oo aan weli ka kicin fadhigii salaadda, waxa kayn yar ee oo u dhow qoorteeda kaga soo mudhyidhi wiilal yaryar oo go’yaal ka waaweyn iyo hadhuub gaalo degta ku sita. Mid ka mid ah wiilashii yaryaraa ayaa markiiba gartay koofiyadii goodaad, ka dibna xagiisa u soo cararay isaga oo ku dhawaaqaya “Alla waa aabahay” wiilka yar soo cararay, waa runtiye Duqu waa aabihii waxay aabihii goodaad ismooganaayeen intii geedaha gu’ la cunayey oo gaadhaysa muddo bil iyo dhowr caanomaal ah. Goodaad waa oday dhako subagle ah, ganka cadina ku

cusubyahay, wuxuuna salaaddaa maqrib ee uu halkaa ku tukanayey usha

ka

soo dhigay socoto hal maalin ah, oo uu kaga yimi reerkiisii. Goodaad, wuxuu denbaabaa Reer weyne dad iyo duunyabo buuxa, wuxuuna leeyahay labo

ooryood, labadiisa aqalna kebduhu marna kama madoobaadaan ee goor walba sidii geed saarbay uga lushaan.

Goodaad bahdiisa weyni, waa guri ay joogaan hablo nacfi badan oo aan qabyada rarada isu dhiibban ee ay midwaliba gu'ga iyo jiilaalka dhowr harrar baarka ka goyso, markaa kaalay arag inta caws duuban ee dhowaan baarka loo tidcay ama loo jebiyey, raradu waa nooc-banooc, shanle, toddobaadle, googoos, waaxyaale, isku joog iwm. Sidookale goodaad bahdiisa yar, udbaha iyo looka sibaaqu kama dhamaado, iyada oo ay labada bahood, bah waliba leedahay kadin Adhi ah, oo aan meesina-meesi lagu darin, ee mid walba gooni loo raaco. Goodaad, maalintii uu Reerka ka soo socdaalayey, wuxuu la soo ballamay min-weyntiisa oo la yidhaahdo kor-dahab, wuxuuna ku yidhi “naa hooy, xagaa iyo geelashii ayaan u socdaalayaaye, intaan maqanahay reerka dayaca ka siiraba, Awrka rarayga

ah ee qooqanina yuu geelasha raacine dabarkaa la ogaada, wananka sumallada ahna shakaalka la ogaada yaanay idaha sumal xaddine. Marwo kor-dahab markii ay si dhug leh u dhegaysatay hadalka saygeeda ayey u diyaarisay anfacadii uu ku safar geli lahaa, waxayna badhax ugu shubtay sibraar, hilib sollay ahna waxay ugu riday kiish, ka dibna intay kabaha subag u marisay ayey sahaydii u sudhay sammayda warranka, waxayna ku tidhi “Alla haku nabad geliyee degsiimadu way kala go’antee haddii aad caawa ka dhaxdo xerada geela kiishkaa gacanta geli, dhulkana libaax baa lagu sheegaaye, jaylaaniga qabso, waataynu shaadaligiina karinaye”.

Markii ay kor-dahab intaa tidhi, ayuu goodaad ku yidhi nabadgelyo, ka dibna wuu dhaqaaqey intuu kabtii suunka u xidhay, warrankii oo labo shaysammayda u sudhanyihiinna degta saaray. Balse kor-dahab, mar kale ayey hadal ka dabatuurtay, waxayna tidhi “inanka balayax wuu arraddanyahay ee magaalada u soo dir callalo haka soo iibsadee”, ka dibna waxay cabbaar sii milicsatay jaanqaadka goodaad, iyada oo qalbiga is kala sheekaysanaysa, isuna miisaamaysa oo is barbardhigaysa faraqa u

dhexeeya talaabadii uu fadlin jiray ayaamihii aqal galkooda iyo maalintaa oo soddon gu' laga joogo aqal-koodii.

Talaabada goodaad ee is dhintay, kor-dahab kuma darin qiimaynteeda gabow, laakiin waxay wax ka saartay maydhan oo ah, dangaladeed oo uu goodaad kaga gogol cusbaa, walow minyarada lafteeda aqal-galkeedii waqti

badani ka soo wareegay. Kor-dahab, waxay weli baaqi ku tahay fir-kanax masayr, oo markasta oo ay jaleecdo Aqalka tasmada bidix ka xiga, waxa wejigeeda ka sindhiidhijiray curfi hinaase. Hase yeeshee inkasta oo uu curfiga hinaasuhu kor-dahab, kaga naxsan jiray, hadana cabbaar ka dib, labada dumar ah, ee isu dangallada ahi, waxay ahaayeen heshiis sheeko wadaagna way ahaayeen. Oday Goodaad, socdaalka dhinaca geela laba qisdi

ayuu ka lahaa: inuu danbarka geela dhalay isku soo dacar bixiyo iyo inankiisa currad oo doob ah, bahda kor-dahabna ah, inuu ku hiyi geliyo arin guur. Markii uu salaadda maqrib dabadeeda ducaysanayeyna wuxuu qalbiga ka lahaa Ilaahow gabadh khayr qabta ayaan kaaga baryayaa wiilkayga. Goodaad, markii uu salaadda maqrib ka baxay waxa bogcaddii uu

ku tukunayey isku soo tuuray wiilkiisii yaraa ee ku soo cararay oo aad ugu faraxsan.

Aabihii, ka dibna goodaad intuu wiilkiisii yaraa il kalgacal ku milicsaday ayuu ku farxay sida ay caanaha geelu wiilka yar dhogortiisa u wanaajiyeen. Goodaad wiilashii yaryaraa ee geel jiraha ahaa, ee ku soo yaacay, wax hadiyad ah uma sidin, iyaguna ugama fadhiyin, waayo dadkii hore ma aqoon nac-naca iyo xanjada sedka looga dhigo caruurta xilligan joogta. Laakiin wuxuu wiilkiisa yar u siday kabo maas ah, oo cusub iyo makiinad uu ugu talogalay inuu dhowr goor timaha kaga xiiro. Waayo masuuliyadda ugu weyn ee waqtigaa Aabaha ka saanrayd inankiisa waxay ahayd, cagaagga oo uu ka rabo iyo timaha oo uu ka xiiro si aan dillin ugu dhalan. Meesha ay goodaad iyo wiilasha yaryari ku kulmeen, waxay ahayd Duleedka xerada geela, ka dibna markii ay odaygii iyo inamadii yaryaraa waxoogaa baarka isu salaaxeen ayaa lagu foofay sidii baylahda loo dayactiri lahaa, sida Nirgo la xereeyo, xaabo la soo guro iyo hadhuubbo la culo.

Walaw wiilkii yaraa ee goodaad dhalay aanu galabtaa hawl ka dhakowsiin oo uu la shaamareersanaa aragtida aabihii oo uu ka uriyey jawi magaalo iyo udgoon-udgoon, ilayn yarku muddo dheer ayaanu habeed geel mooyaane

wax kale urinne. Geeljirayaashu waxay ka koobnaayeen saddex raqam oo kala ah doobab, kurray iyo xerojoog. Nooca xerojooga loo yaqaan, waa kurray soo koraysa, waxaana laga keenay reeraha, iyada oo badiba la soo kaxeeyo xilliga naqa, gu' iyo Dayr, hadba kii la doono. Waxtarkooduna kama badna dabka oo ay shidaan, Nirgaha oo ay ragga geela lisaya ka celiyaan, shillinta oo ay geela ka guraan iwm. Yaryarkani, hadii ay yidhaahdaan caanaha waanu ka dheregnay lagama yeelo ee waxa lagu cabsiiyaa dhenged xoordhuug ah, habeenkiina waxa la seexiyaa Ardaa debedda u furan si ay saxarada iyo kaadida ula tagaan banaanka ku dhow. Inanka yar ee laga maqlo waan haraaday oo biyaan rabaa, waxa la maroojiyaa dhegta, garaangariyo hadal naxariis lehna nin ku yidhaahdaa xeradaba uma soo hoydo. Wiilka yar ee jil-jileec lagu arkaana waxa loogu yeedhaa naanayso ay ka mid yihiin habari korisay, Adhimaal iwm.

Wiilasha yaryar si loo carbiyo, waxa lagu odhan jirey, marka geelu dhalo mandheertiisa ku dul boodbooda, waxayna arintaa iyo kuwo kaleba ka mid yihiin tacliinta iyo tababarka lagaga baxo Dugsiga Hoose ee cilmiyada Reer Geeljire. Galabtii goodaad yimi ayaa markii hadhuub gaalladii culaygii lagu midiiday, ee cidaadda lagu masaxay, waxa lagu foororiyey dhulka. Nirgihii edegga ku jiray, ayaa mar qudha yuus cirka isku shareeray, iyaga oo u hal celinaya Reenka, tulud meel durugsan ka soo ololaysa. Markii la maqlay reenka ka soo yeedhaya ayaa la iska gartay inuu galyankaasi yahay hal tilmaaman oo loo yaqaan Gobaad. Hashaas oo maalmaha kareeb cusub ahayd, intay mudhayo iyo maajeen hawrtay, uurka ka

dhaamisay ayay labada gelin, kii horeba afka dhulka ka daysay maalin oodhan kurraydu juuda-hayeen, darar awgeedna ibo dilaac qarka u saaran. Kadibna intay candhada gorof legedka ku haynkari wayday, hadba gollaha dhinac uga tuuraysa, oo ay dambeedadu hibitiqayaan, caanaha gororkooduna sibraha qooyey.

Ayaa kurraydii oo daallani casar dheere ka hor leexdeen. Ka dibna iyada oo aad mooddo soddon qad loo horray Darka ceelkii xunbo weyne ayey cagaha soo Boorimaysatay, halkaas oo ay geelii kale ee eeridhabanka ahaa

sidii eebo la riday soo dhex mudhay. Gobaad markii ay soo gaadhay xeradii ay ka foofatay, waxay luqunta u ridatay Edeggii Nirgaha, ka dibna waxay ursatay Nirigteedii. Cawaysinkii markii ay geelashu xeryaha ku soo dhamaadeen, waxa markiiba loo diiriyey gaawayaasha, waxaana halihii ka reebka ahaa loogu hor godlay goobaad, oo aanay suurogal ahayn in hal kale laga hor godlo. Goobaad, waa madi is-nacday, waxaana la isu dabo joojiyey labo hadhuub gaal oo mid walba mar lagala hoos baxay, isaga oo xoorku sida koofiyadda isu taagay. Goodaad, wuxuu dhex galay xerada geela horweynka ah, isaga oo dheehanaya geshiga ka muuqda dhogorta geela. Baarqabka geella oo dhibidu caaryeysatay ayaa sida danabka uga sanqadhinaya doobta. Awrka baarqab waa ina qoton, waa neef muuqaalkiisa

laga cawdibilaysto oo sida heego daruur ah, cirka jeex kaa qarabaya. Waa neef marka uu dhoollaha is mariyo sida ciyowga ugaga dhawaajiya micniyaha. Hadii uu doobta ridona waxa dhulka ka hinqada haadda iyo shimbiraha, taas oo uu kula baxay naanays caan ah oo la yidhaahdo goray-kiciye. Awrkii goray kiciye, markii uu geela ku dhex arkay goodaad ayuu khoof muujiyey oo uu dhoosha ka jiriqsaday, dhibidana dhabarka saaray.

Goray kiciye markasta oo uu doobta ka cisiyo, waxa goojo la amaara, qaalmu badan oo uu tiftii gu'ga jeeniga mariyey, ka dibna abaaho qaatay. Baarqabkii goray kiciye, wuxuu habeenkaa ku cadho burburay Duq abaahoqabsanwayday oo geelal kale ka soo wareegtay. Markii geelashii laga hadhuub dhigay, waxa la isugu yimi golihii geela, oo kash-kaash sida furaashka loogu goglay. Ka dibna waxa loo dooyeystay waraysi, waxaana warka laga toomiyey oday goodaad oo socoto ahaa, iyada oo uu hadalka ka guurayey, nin la yidhaahdo Gaax-nuug oo ka mid ah ragga geelasha hayey. Oday goodaad, waxa warka lagaga guray jawi xasiloon, wuxuuna hadalka ku bilaabay "Nimanyahow la idiin warran, Anigu saaka subixii hore ayaan kabta ka soo illaday reerihii oo yaal meesha la yidhaahdo Adaadaxa lafcaryaale ee ka sii rogan teedka Cawl ku dhal. Arladaa dad iyo duunyo wixii joogay way nabadgelyo qabeen, tigaadda

gu'guna ma seegin, geedka adhi la yidhaahdaana,

wuxuu raafka kula dhiriqda gunimo, naylahana qaadhka lagama saarin. Hadii eebe kuu roonyahay dhulkaa aan soo maray udubka reeruhu ma soo gaadhin, nimcaduna ma kala go'na oo ma jirto meel aanad cagta ka dhowrayni. Aniguna tilmaanta xerada ayaan hayey oo waan ku soo tibaday, oo galabtaba waxaan ku tukaday duleedka xerada". Gaaxnuug oo oday Goodaad warka ka guraya, ayaa jibta haya oo leh "waa kow".

"Socotadayduna ma ahayn mid idin kama shishaysa, warna waa iga intaa waryaridaa, warran weriyo meel kale ka timina ma ogi, wax waydiina ogaal, waa sida" ayuu Goodaad ku soo afjaray warkiisa. Gaaxnuug oo warka

ka guraya oday Goodaad, ayaa yidhi "warkaa meelmar adiga iyo waalidkaaba, Alle ma cadaabo".

Intaa markii la isdhaafsaday ee Goodaadna looga waramay xaaladda geelasha ayaa sheekooyin googoos ah, la isu dhiib dhiibay. Goor ay cawaysin dambe tahay ayaa la durduurtay caanihii lista ahaa oo hadhuub gaaladii ku ceegaaga. Hase yeeshee Goodaad iyo wiilkiisii Balayax waxay isula faq baxeen ardaa gooni ah oo qoryo maaci ahi ka hulaaqayaan.

Balayax, waa wiilka wiilasha Goodaad u weyn, waana 18 jir, intiisa ku muddakar ah, wuxuuna la dhashay toddoba hablood oo qarkood guryo leeyihiin, qaarna weli timo tidcan yihiin. Balayax waa wiil la jecelyahay, oo ay dhaarta ugu dambaysa ku maraan hablaha la dhashay, waana ninka kadinka geela ah, ee Reer Goodaad u go'ay, ee kayn daaq leh

iyo kob dureemo lehba daajiya. Habeenkaa markii ay Goodaad iyo wiilkiisu iswaraysteen, oday Goodaad uma sheegin Balayax inuu ku camal jiro inuu sannadka guursado. Isaga oo Balayax jecelaa inuu aabihii ka taliyo Arrinta guurikiisa. Waayo Balayax, wuxuu sidaa u yeelayay maadaama uu yahay bahda weyn, oday Goodaadna minyaro bilcamay, waxaa meesha yaalay

hinaase baheed, sidaa awgeed, wuxuu Balayax door bidayey inay arrintu xagga odayga ka timaaddo.

Dhinaca kalena, waxa jirtay haar damqanaysay Balayax, oo nabar caashaq labo jirsaday hurgumo (caabuq) ku soo kicinayey. Waayo wuxuu

xusuusteeda

ka lediwaayey gabadh cudbi la yidhaahdo, oo ay dayrnimadii ku ballameen inay isguursadaan marka ay hoorto dhibicda u horaysa ee gu'gu. Hase yeeshee werwerka iyo walbahaarka Balayax ku foogani waxa weeye, iyada oo

curashadii gu' laga joogo bil iyo habeen, oo ay ballantii muddo dhaaftay, gabadhii cudbina aan war dambe lagu celin. Goodaad, illayn waa nin maanta oo dhan socod ahaaye, intuu dabka dhinac u banneeyey ayuu hurdo lac yidhi. Hase yeeshee Balayax wax baa ka hugmayey oo hurdada kala tacaalayey, waayo waxa ku rafaanaysay xusuusta gabadhii uu jeclaa, ballantii oo muddo dhaaftay, waxa u muuqatay cudbi oo raagsatay oo nin kale la baxay. Waxa kale oo talada Balayax sii cakiiray qabiilkiisa iyo qabiilka Cudbi ka dhalatay oo colaadi dhex martay, dhowaana ay dilal cusubi ka dhex dhaceen oo ay aano cusubi dhextaal, sidaa awgeed labada qolo isma bixinayaan, balse Balayax Cudbi waa jecelyahay.

Ma jiraan, waqtigaa waraaqo iyo telefoonno la isu diraa. Afkiisa mooyaane, af kalena amaano uma galo. Haduu doonaanla Cudbi Reerahooduna

Balayax arkaan, lagama yaabo inay bixyaan, waayo Daanno weyn baa kala

dhex miranaysa labada qolo. Hase yeeshee Balayax ma aha nin ka negaanaya

meel kasta oo ay Cudbi joogto. Goodaad, markuu hurdada sardhadii hore iska rogay wuxuu arkay Balayax oo fadhiya oo dhulka xariiqaya, kadibna Goodaad, wuu yaabay, dabadeedna intuu soo sare fadhiistay ayuu yidhi "Aabo maxaa ku helay oo aad la seexan wayday". Balayax hore uguma jawaabin odayga, ee cabaar ayuu aamusnaa, waxaana qalbigiisa ku soo dhacay ereyo gabay ah, oo uu dareenkiisa kaga turjumayo inuu guurdoon yahay, wuxuuna holladay oo yidhi tixdan gaaban

"waxaan aabo tebayee,
hurdada iga talowsiiyey,
waa taa gadhkii teedyar iyo
timo ka muuqdaane,
tu'yar oo halkeer joogta,
baan taab isleeyahaye,

jeeroon targaafaha ku tago,
teedka qudhacweyne,
timodheerta aan rabo
anoon tuuyo kula loolin.
Hurdo iima taallee,
maxaa adi ku soo toos-shay”.

Goodaad, markuu tixdaa gabayga ah, dhegaystay ayuu isaga laftiisu
godladday, oo uu isna gabay ugu hal celiyay, wuxuuna yidhi:

“haddii Balayaxow timo yar iyo teedku kugu meero,
wiilyahow “Hadaad, telaledood gabadh ku taamayso,
inaan aabbo taban-taabiyaa waa tu waajiba’e.
Gaafkaaga inaan tiiriyoo, tiirsho garabkaaga,
taakulo inaad iga heshaa waa tu’aan rabo e
aabbo anigu waan kula tabciye qaado taladayda.
Taxaashkiyo hadaad tamashle guur, teedka sare gaadho
dumar kala taggane Balayaxow iga tilmaanqaado.
Kol hadday talaabada, sidii tugulo luudayso,
tartarada hadday muujisoy toban dhexqaadayso.
Tamar malaha oo waa mijo cas aad u taag darrane.
Aabow, ha tooyanin hadaad talo iwaydiisay”.

Markii ay Goodaad iyo wiilkiisa Balayax tixahaa gabayga ah is
dhaafsadeen ayey Golaha timi arrintii odayguna la seexday, wiilkuna ka
gam’i waayey, ka dibna markii ay sheekada cabaar gorfeeyeen, waxay isla
garteen inuu Balayax guursado. Dabadeedna Goodaad baa yidhi “aabo
shaydaan wax la yeelye, waxaad yeelaysaa, subaxa aroorta ah, laga
bilaabo hawshii guurkaaga kabta u illo, salaadda horena baqool, reerkii
iyo hooyadaana sii mar, Awrka madow ee rarayga ahna hogaan sudho oo
iibso, ka dibna waxna magaalada kaga soo muraadso, waxna jiscin ka
dhigo”. Balayax, inkasta oo aanu kaarku hawlyaridaa kaga ba’ayn, ayaa
iyada oo ay hurdadu waxoogaa u yara dhadhamayso dhinaca dhulka
dhigay oo
yara laabandoodsaday. Ka dibna subixii intuu sibraar weyn caano ka
dhaansaday ayuu baqoole cagaha boorimaystay, isaga oo waxoogaa
jarmaado

ah, ku dhuftay. Subaxaa Dhirta dusheeda waxa ku qotoma sayaxii aroornimo, dhulka oo gadiisuna waa dharab ciid qoyaan leh. Jaqaqarida iyo geed caleemeedka hawray Waxa dushooda ku qotoma dhibco biyo ah oo aad mooddo inay ilmo ka gobo leedahay. Hoostoodana waxa subka marab tigaada ka malan da'ay. Waxa dhulka ku gedfan.

Dhulka waxa ku gedfan qiiq midabka ceeryaamada leh, waxaadna dareemaysaa

cimilo degan iyo jawi diirimaad leh. Kaymihii iyo Arladii tigaadda lahayd ee uu salaada hore dhex jibaaxayey, ayaa cidh-baha ilaa kubabka qooyey. Kadlaynta iyo kaynaan socodka Balayax wuxuu ahaa mid saayid ah.

Dhul maalin socod lagu gaadho, ayuu Balayax u socday maalin gelinkeed. Markuu cagta soo dhigay jiidii reeraha loogu tilmaamay ayuu jaanta yara dhimay oo sawaxanka degmada yara nuugsaday, kadibna wuxuu maqlay luuqda

dhawaaq muddo dhegihiisa ka raagay. Waa cod Dumar oo naaxiyad leh, codkaas oo ay maqalkiisa si isdaba joog ah, hirarka laydhu isaga soo dabotuurayso. Dhawaaqaasi, wuxuu lahaa “Barranbarshaaleeyey, Buul shareeraay, ma maantaan bah kuu helay. eedba geedka u dheer laga garaacyey, galool mudhay mulaaxdiiyey”. Balayax wuxuu markiiba gartay inuu codkaasi yahay gashaanti la dhalatay, oo walaashii ah. Taas oo wax ka luuq cuddoonayd oo markay afka kala qaaddo sida fardaha u dannani jirtay. In yar ka dibna wuxuuba soo gaadhay dudadii gurigooda, dababdeedna hore uma gelin Aqalka ee wuxuu ku leexday qudhac Damal ah,

oo ku yaal duleedka guriga. Geedka damalka ah, waxa hoos fadhiyay raxan

dumar ah. Waxayna dareerinyaan kebed samaynteeda farta lagu hayo. Kebeddaa oo ay unugtay gabadh ina Goodaad ahi, waxay ka mid tahay rarada

loogu talogalay guurka iyo Aqal-galka Balayax.

Dabadeedna wuxuu Balayax salaan gacmo taabasho ah iyo bariido kalgacaltooyo ku dhameeyey rag iyo dumar, caruur iyo waaweyn, wixii dad gurigooda joogay. Goor ay cawaysinkii habeenimo tahay oo naylaha idaha

loo dhigayo, ayuu Balayax Hooyadii Kor-dahab ku wargeliyey inuu aabihii Goodaad u ogolaaday inuu guursado. Hooyo Kor-Dahab arintaa riyaaq iyo raynrayn bay ku ansixisay. Ka dibna Balayax iyo hooyadii Kor-dahab, waxay gudogaleen fallanqayn ku saabsan Reerkii lagu hagaagi lahaa iyo inanta la tuhmayaa, ta ay tahay. Hase yeeshee Balayax Cudbi iyo sidii uu u heli lahaa mooyaane, madoonayo inuu gabadh kale iyo sheeko kale waqti iskaga lumiyo. Balse Balayax kuma yaaliin carrab iyo labo Dibnood, oo uu ku yidhaahdo, waxaan doonayaa Cudbi iyo reerkooda. Haddii lagu maqlona, waa la dayrinayaa, waayo labada Reer dirir mooyaane, doonyeysi guur kama dhexeeyo.

Kor-Dahab iyo wiilkeeda Balayax waxay wada fadhiyaan ardaa ku yaal qol-qolka oo ka garab dhisan Aqal-kooda. Kor-dahab, iyada oo wiilkeeda uurbaadhanaysa, ayey intay ku soo dhawaatay oo garabka midig gacanta ka saartay, waxay hadal kaftan ah ku tidhi “Hooyo, horta miyaanad hablaha la haasaawi aqoon, weli inanna afka ma u kala qaaday, oo ma lahaasowday, takale gabayada iyo maahmaahaha, sidee baad isku tihiin. Ilayn ninka ammuumiyaha ah, haweenku uma soo joogsadaan, oo waa tii hore loo yidhi Nin aan hadlin habartiina wax ma siiso’e”. ka dibna Balayax, intuu dhoola caddeeyey ayuu yidhi “Hooyo gabdhaha iminka joogaa ma maahmaah iyo gabay inay u baahanyihiin baad moodaysaa, waa loo gacan haadiyaa, oo way ku soo raacayaane”. Kadibna Kor-dahab, intay afka gacanta saartay ayey tidhi “waar aniga ha ii soo kaxayn, kuwaa gacan haadiska ku imanaya, sow hadhowna gacan haadis kale ku dhaqaaqi mayso, maxaad taa u odhanaysaa, hablo badan oo dhisan karaya, oo dhaqan karaya ayaa dhulka buuxee, miyaanad arag hablaha gashaantiyaha ah, ee reerkan agteenna ah

bal orda oo intaad inaadeerkaa is-raacdaan gaadha, weliba buulyar oo gaar ahna way leeyihiin”. Markii ay Kor-dahab iyo wiilkeedu kaftan dhamaysteen, ayuu Balayax soo jeediyey in horta inta aanu gudo galin jiidaasha guurmeernimadiisa, uu u baahanyahay inuu magaalada u muraadsi

tago, Awrna uu Reerka ka kaxaysto. Kor-dahabna arintaa hadal kama soo celin ee waxay tidhi qabuul. Balayax iyo Coolli, oo inaadeerkii ah, ayaa cawaysinkii ciyaar gud u baxay, ka dibna waxay afka saareen jihada Bari oo beesha mugeedu u badan yahay.

Qoodh iyo xero, markii ay sawaxanka Reerka ka libdheen ayey geed cufan dugsigiisa fadhiisteen, dabadeedna waxay sanqadh dhegaysteen sacab iyo sawaxan ciyaareed. Dhaqdhaqaaqii ayey joojiyeen, dhegahana laydha ayey

la raaceen, cida adhyaha, qaaqda orgida qooqan, dananka Naylaha iyo sawaxanka xoolaha ee hareerahooda ka baxaya ayaa cabaar dhegahooda mashquuliyey. Hase yeeshee, waxoogaa ka dib, waxa dhegahooda ku soo dhacay codka iyo ciyaarta saarayda la yidhaahdo, oo meel daaqsin Geel jirta ka balwanaysa, kadibna markii ay hubsadeen inay ciyaar tahay ayey labodooduba, halmar yidhaahdeen “walaahay waa baxaysaa”. Kadibna inta la

kaakacay oo afka la saaray jihadii ciyaartu ka baxaysay ayaa dhababaco dhegaha la nabay. Kadle iyo kabti, waxay kaymaha cufan ku sii dhex jibaaxaanba, oo ay dhawaaqa iyo jibta ciyaarta, kolba laydhu ku beerqaaddo, waxay ku soo baxeen golihii habeenkaa ciyaarta saarayda loo butaystay oo laga weegaaray kax banaan. Waa afar iyo tobnaad, intuu dayaxu mudh iyo gacan iska dhigay cirka xuduntiisa isku beegay, oo ay falaadhaha iftiinkiisu, arlada dharaar ka dhigeen. Waxa gigida ciyaarta isku arkay dhalinyaro jibbada iyo balwadda ciyaarta saarka u suuqmay oo ka soo kala dareeray guryo caanaha gadhoodhka iyo maydhanaanka ahi furarka ku qotomaan, ciirtana la daadiyo. Golaha ciyaarta, waxa sida faraawilka ugu heemaallan qaanso gabdho ah, oo intay sararta iyo garbaha isa saareen, raxlada jaanta iyo kaga dayaaminaya, oo aad jaanqaadkooda moodo mowjado badeed oo haraacyaya. Intaa waxa dheer, luuqda sida fardaha u dananaysa, iyada oo aanay marna isla waayeyn jaanta cagta, jibta codka iyo jamalldhowga sacabka.

Waxa Golaha Ciyaartan saarayda ka dhex haloosiyaya wiilka
qalambaawiga
ah, ee markuu ku dhufto hoobayda, ay luuqdiisa gabdho daayoo,
islaamaha
tukubaha sitaa usha soo qaataan, waa qawdhan yare waa marka ay
xaraaradu
cirka gaadho ee ilma ciyaar yaqaan usha lagu kala hore. Balayax iyo
coolli, markii ay ciyaarta qoobka ge.liyeen, waxa dhexdooda ka rablaysay
timo dheer gabadh ah, oo agmarkeeda naftu ku raaxaysanayso,
guudkeedana
sumbulo ka duulayaan, lamase aqoonsan reerka ay ka soo baxday ama ay
ka
soo cayaar guddey!. Balayax oo Eebe hibo u siiyey luuq baxsan oo marka
uu ciyaarta ku qaadayo hablaha sida caanaha ciirta loo lula u lusha,
ayaa ciyaarta jeeniga geliyay, oo ku dhuftay luuqdiisii coddoonayd,
waxaana erayadii uu ku dhawaaqayey ka mid ahaa “Hoobey, hoobey,
hablow
weli qaadka maan baran, ragga qaayib iyo laan, qolmadoobe iyo hawd,
qawl
daajiyaan ahay, caawadan qudheedana, anigoo maryaha qubay, qab
idhoon
hurdada ledday, ayaa qaraxa sacabkiyo, qalaadkiinu ii baxay. Hablihii
Qaali iyo Qamar, qorshe iyo ugaaso cad, qalbigaa idin doortee,
qaayibaay, nabad ma sheegteen qoyskiinu waa kee?” Ka dibna markuu
Balayax intaa yidhi, waxa u jawaabtay Bullo gabadh ah oo tidhi;
“Caliyow, inaadeer, ciddu way nabdoon tahay, colka dhiigga daadshiyo,
caarodhuubi may dhicin, cudurrada wax laayiyo belo culus ka yaasiin”,
gidiga habeenkii waxay dhalintu jiipta iyo sacabka isu baacisoba, markii
uu waagu hoosta ka soo guduutay ayaa lagu kala dareeray ciyaartii.

Goobtii Dirrida ahayd na waxay u ekaatay gel-gelin boodh leh, cago
habaas leh, ayaa lagala dareeray. Habluhu iyaga oo koox koox ah ayey
intii isku degsiimo dhawaydba jihadii guryahoodu ka xigeen u dhaqaaqday.
Hase yeeshee, raggu, ninna ma aadin jihadii gurigoodu ahaa ee nin waliba
wuxuu ka dabo dhaqaaqay gabadh meel martay, si uu inta yar ee
habeenka
ka hadhay, ereyo ula gaadho. Balayax iyo Coolli, waxay jaqaftii horeba

feedha ka raaceen afar hablood oo meel wada maray. Afarta hablood waxa ka mid ah, gabadh la yidhaahdo Canab, oo ay Collaadda ka hor isku ogog lahaayeen Cudbi. Labadii wiil, waxay soo qoortaanba waxay gabadhii Canab

ku soo gaadheen dugsi u dhow gurigooda, ka dibna halkaas ayey Balayax iyo Canab, waxoogaa isku muteen, markii waxoogaa jikaar iyo haasaawe dhalinyaronimo oo googoos ah, la isu dhiib-dhiibay ayaa aakhirii Balayax badheedhihiisa dhiibtay wuxuuna ku tiraabay “Inanyahay waxaynu joognaa xilli xun, waynuna daallanahay, muraadka ugu badan ee caawa ikaa

soo raaciyey, waxa weeye, waxaan warkeeda doonayaa inantii Cudbi ee kal

hore sheekadu noo socotay, maxaad war iyo wacaal ka haysaa, reerkoodiise meel uu yaalo ma garanaysaa”.

Canab intay hogatay oo dhexdeeda madagta ah, gacanta ku cuskatay ayey tidhi; “Horta inanta aad iwaydiinaysaa ismaan lahayn, way isu baadiyoobaan, waxaase igu maqaalo ah, inuu reerkoodu ka mid yahay beesha

degan idhanka xuunshaale, inankoodii weynaana, Colaadii dhowayd ayaa gaade lagu dilay, balse ismaan lahayn Balayax waxbaa ugu baaqi ah, Cudbi

iyo reerkooda, iminkana waan hoyanayaaye, Alle baadida hakuu soo dhoweeyo”.

Balayax wuxuu tashigiisii maalintaa ku gaadhay go’aan adag, oo qof dookh caashaq la ibtiloobay mooyaane, qof kale jar iska xoonimo ula ekaanaya. Wuxuuna go’aansaday wax kasta hakala kulmee, inuu subaxa aroorta ah, afka saaro jihada ay Cudbi ka xigto. Sidaa awgeed awrkii uu sayladda Hargeysa ku waday wuxuu kaga tegay Reer Tuulada uu u hoyday agyaal oo ay

qaraabo ahaayeen, wuxuuna ku yidhi; “Awrka seeto adag ku xidha beertana

ha daaqa, labo habeen baa idinka maqnahaye”. Ka dibna wuu dhaqaajiyey, socodkiisu wuxuu ahaa mid jar iska xoonimo ah, oo uu ku beegsanayo halka ay degan yihiin Cudbi beeshoodu, “Nin Cudbi ka maqan tahay

dhiirranaa” ayaa qalbigu ku xanshaashaqayay, jidka uu marayaa fogaa oo cabsi badanaa, Balayax wuxuu afka saaray ay jiq ah, oo ay kaga horeeyaan

dad cadow u ah, oo hadii ay arkaan aan bixinayn, waxa kale oo ka horeeya cadow dugaag iyo kaymo libaaxu awda ka hayo, iyada oo aarka kaymahaa jamal dhabanayaa ka badan yahay ayaxii wartimire, balse Balayax, waxaasi

uma muuqdaan oo arinkiisu waxa weeye “Nin meeli u caddahay, meeli ka madow”, cidna talo ma waydiin ee hortaa banaan buu isaga dhaqaaqay. Baxdo iyo dhacdo, gidiga maalintii wuxuu ku jiray gucle iyo talaabadheer fadalku dabo yaalo, xiiq tirashona iskuma deyin, degsiimadu waa kala go’an weliba col joogeen ah, halka uu ka yimi iyo halka uu ku socdo dab uma dhexeeyo, wuxuu fadliyaba goor habeen badh ah, ayuu hulaabtay go, madow oo uu tuurta ku sitay, halkaas oo qiyaas ahaan kala badh ah halka uu ka yimi iyo meesha uu ku socdo, waxaana weeye kayn cidlo ciirsila ah, oo ay sabaana nuux dad iyo duunyo ugu dambaysay.

Habeenkaa ciyawoga wiiqda haya, jiriqaaga dhiidha haya iyo sawaxanka shimbiraha hareerhiisa ka shallaadaya ayaa wehel u ah. Balayax, habeenkaa socodkii kama jimcin, wuxuu ku talo jiraa inuu nuska hore ee habeenka ka gudbo soohdinta libaax galeenka badan. Balayax, ma ahayn nin

fulinimo lagu yaqaan, oo libaaxa ka baqa, habeenkaana wax hub ah, toorri buu sitay farolaabna waxa u ahayd, dhenged baarka hore feedhan. Waayo sida uu socdaalka ugu doqomaysan yahay ayuu hubkana nacas ka yahay. Libaaxa meesha uu marayo ku nooli, wuxuu libaaxyada jiidaha kale, ku nool dheeryahay waa Libaax dhadhamiyey hilib dad, oo wuxuu ku hororoobay

colaado ka dhacay jiiddaa, oo uu hilibkooda cunay maydadka, raggii ay iska laayeen labada Col; Balayax, wuxuu saqda dhexe jeerrinka iyo qansaxa jilibka ku dhuftaba, mar qudha ayuu meel dhabarkiisa ku beegan, kamaqlay sanqadh iyo ci siba’an u hanqaadhaysa, ka dib ninkii Balayax, waxa kor iyo kal isku jebisay jidhiidhico ba’an dareen cabsiyeed ayaa isku gadaamay, xaadda jidhkiisa ayaa isla oogsatay, xubin kasta oo jidhkiisa kamid ah, waxa siidhi ku wargeliyey dareenka cabsiyeed ee saaqay. Kubabka ilaa gacmaha waxa ku baahay firka nax cabsiyeed, garaaca

wadnihiisa ayaa feedha bidix ka ruggle, garray wuxuu inuu libaax yahay. Mar kale ayuu maqlay sanqadh tii hore ka yar oo u dhawaaqaysa (Fuu-Fuuf-Fuuf). Waxa weeye aar Libaax oo raadkiisa sanko la raacaya, waa bahal mamay oo uu hilibka dadku u soo hillaacayo. Balayax, cabsidii ayaa ku siikorodhay, ka dibna orod buu miciinsaday, libaaxii awelba orod buuku jiree, isna wuu eryaday.

Hase yeeshee, Balayax, habaq-habaqdii orodka ayuu xusuustay tabihii libaaxa la isaga difaaci jiray. Ka dib go'iisii ayuu hudhunka gacanta bidix ku duubtay, wuxuuna ku leexday guri madhan oo laga guuray, dabadeedna markuu arkay inaanu si kale ku baxsanayn ayuu geed oodda guri

caska laga guuray ku dhexyaal degdeg u koray. Libaaxii isaga oo goojinaya oo balayax raadkiisa sanko ku haya ayuu dhakhso u soo gaadhay

balayax oo geedkii sii koraya, ka dibna cidiyaha ayuu la haabhaabtay, isaga oo gurmamaya, laakiin Balayax wuu ka baxsaday oo ma gaadhin libaaxii, ka dibna intuu geedkii dhakada uga baxay ayuu rako yar badhida saaray, gacmahana labo laamood oo kala durugsan ku kala cuskaday. Libaaxii intuu indhaha kor u laliyey, afkana kala waaxay ayuu geedka hoostiisa istaagay. Belaayo, kolba ta dambe ayaa darane, Balayax, oo geedkii fuushan oo is leh, belaayadii waad ka badbaaday iskanaeegaya inuu libaaxu ku soo boodo, ayuu hadana maqlay sanqadh kale oo geedka gebigiisaba wada ruxday, wuxuu maqlay shamamax, ur aad u qadhuuna waa

uriyey. Kor buu eegay, saa wuxuu arkay bahal mas ah, oo dabadu orgi le,ektahay oo madaxiisa balaadhka aad yaabto, oo intuu laan kale kaga soo gudbay gacantiisa soo dhaafay, aadna u miliqsanaya oo galaabi xiniya carrab labo faraarle ah, oo aad xadhig moodo. Waxa labo iyo luqun modoobe aad u dhalay oo geedkaasi hoygiisa yahay, gurigana reerkii degaaba uga qaxay. Ninkii Balayax dhidid buurbuuran ayaa shax ka soo yidhi oo tin iyo cidhib qooyey. Ka dibna intuu balayax indhaha galka ka rogay, oo afku in taako le'eg kala tegay ayuu gacantii masku ka soo korayey si degdeg ah, kor ula booday, isaga oo qaylinaya oo firka naxsan, ayuu luquntii maska gacanta si xooggan ugu daafadeeyey, dabadeedna maskii ayaa dhulka u dhacay.

Culayska masku qof buu miisaan le'eg yahay, ka dibna meel Libaaxii u dhow ayuu gab ku yidhi, dabadeedna Libaaxii ayaa mooday ninkii geedka fuulay oo soo dhacay, ka dibna ku soo booday. Maskii iyo Libaaxii oo mid waliba cadhaysan yahay ayaa geedka hoostiisa daf is yidhi, Libaaxii wuxuu bahal qaniinyo ah ka buuxsaday adhaxdii maska, balse maskii ayaa isna miciyihiisii waabayda lahaa ku arooriyey dhegtii libaaxa. Ka dibna sidii ay isu haysteen ayey labadoodiiba naftu iskaga dul baxday. Balayax naxdintii ayuu ku qalalay laan geedka ka mid ah, welina cabsidii kama hadhin, waayo wax jawaab ah kumay soo celin oo ma oga inay labadii bahalba dhinteen. Dabadeedna habeenkii oo dhan, wuxuu ku tigtignaa geedka dushiisa, wuuna arkayey inay bahaluhu isku maran yihiin.

hablo wadaan awrtaas oo alaabo benderka weyn laga keenay lagaga soo qaadayey meel tuulo ah, ka dibna Balayax awrkii buu ku xidhiidhsaday. Habalaha awrta wadaa way geeraarayaan, waxayna leeyihiin; “waar cadaawe-cadaawow, waar cadaawe halyeyow, Alla xaluu tiir ku xidhnaayoo, alla shaluutaagan ahaayoo, Alla maanta waa tub ku joogeey, ululu- lulu”. Luuqdaa baxsan iyo mashxaradaasi, waxay Balayax ka mash-quulisay su'aalo uu jidka isku sii waydiin lahaa, waxayse Balayax iyo awrkii Dhiddar, wadadu ku saddex noqotay, markii ay gabdhihii iyo xidhiidhii awrta ahayd, u leexdeen tuuladii ay ku socdeen.

Waa ma dhacdo inay qalbiga Balayax ka tasowdo xusuusta Cudbi.
Markasta

iyo meel kasta Ayaaniba ayaan ka tilmaamane, wuxuu Balayax xusuustay xilligii hore ee uu haasawahoodu toosnaa, sidaa awgeed wuxuu socodka ku

xusuustay, goor casar gaaban ah, oo ay isaga (Balayax) iyo wiil kale ay ku soo cadceedsadeen Cudbi iyo gabadh kale oo kayn aftoollin ah, ka guranaya cawska loo yaqaan timo habloodle iyo caws garaf, oo ah noocyada

lagu sameeyo harrarada quruxda badan. Labada hablood, waxay dhexda ku

xidhan yihiin foodado aboole ah. Cudbi waxay lebisaa tahay, toob garbo banaan, mindi yar ayey kolba bur ku goosanaysaa, oo sidii goray

qadhaabsanaya ayey kolna dhulka ku foorarsanaysaa, kolna kor uga toosaysaa. Cuddoonaanta Cududaha, xiisaanka abaadhyaha ee luqunta ku xardhan iyo qosolka xishoodku ku dheehan yahay, ee Cudbi ayey galabtaasi

noqotay, galab ay xusuusteedu ka hadhi wayday Balayax, waxayna ku noqotay arrami ugu soo kacda sida qaniinyada abeesada, waxbase uguma jilla hadii uu maalintaa gebi kala dhexyaalo, isaga (Balayax) iyo Cudbi balse qadarkaa xusuusta ah, ayuu ku dhaafay masafo balaadhan. Mar danbe

ayuu sidii qof dheelalawsan madax kor u qaaday, dareenka wajigiisa ayaa kalgacayl la dheellintay, ka dibna waxa labadiisa indhood ka soo qabax yidhi baro waaweyn oo ilmo ah. Hadana inta uu keligii isu dhoolacadeeyey ayuu hareeraha eegay, mise wuxuu marayaa Tuuladii uu caawa u sii hoyan lahaa afkeeda. Balayax, weligii wuxuu aad u jeclaa inuu mar uun magaalo weyn tago, isagoo lacag awr-gool ah la siisto sita, wuxuuse maalintaa ka jeclaa inuu cudbi mar qudha arko.

Balayax wuxuu islahaa Libaaxa iyo masku iyagaa isku mashquulsan, oo hadii aad isdhaqaajiso way kugu soo baraarugi doonaan sida awgeed, sanqadh neefsasho ka badan wuu iska ilaaliyey habeenkii oo dhan, qalbigana wuxuu iska lahaa “Ilaahow colkayaga colku furo” waxa kale oo uu hoos ugu xanshaashaqayey “Alla maxaa kugu soo watay, geedkan jaan, ee

aad dhirtaa kale u fuuli wayday” ayuu naftiisa ku canaanayey.

Balayax, wuxuu habeenkii oo dhan geedka dushiisa ku tig-tignadaba, markii uu kaaha waaberi soo iftiimay, ee nin iyo geed lakala gartay ayuu hoos u soo yara daadegay, oo isha ku biniiniyey labadii bahal oo geedka hoos jiifa, shakibaa kaga jiray inay bahaluhu nool yihiin iyo in kale.

Dabadeedna wuxuu arkay dhiig badan oo maskii ka qulqulay iyo Libaaxii oo

lugta taagay, ka dibna qunyar buu hoos u soo dhaadhacay, isagoo weli shakisan, oo aad isu banbaaninaya dhulka markuu qoobka la helay, isaga oo aan xagaa iyo xagaa toona eegin ayuu qarjaf yidhi oo dhababaco cagaha

wax ka deyey, dabadeedna isaga oo aan marqudha xiiq-tiiran, ayuu oradkii ku tegay meel saddex geel daaq u jirta geedkii. Balayax, intuu dhowr jeer xagga dambe qooransaday ayuu isma taagine kadle cagaha

boorimaystay.

Weli wuu naxsan yahay, wuxuuna u muuqdaa nin belaayo ka samato
baxay
cunto uu dhadhamiyo, waxa u noqotay qodxanyaha jeerinka ee canbuusha
loo
yaqaan, faraha curdinka ah, xaangeenyada iyo geed midhoodka
midhoodka oo
curdin badan lahaa. Ta kale, adeenti dad aragooda wuu iska ilaalinayaa,
oo kaga darran bahalihii xalay helay waayo wuxuu ku soo fool leeyahay
jiiddii ay deganaayeen beesha Cudbi ee ay beeshooda colaaddu dhex
martay. Sidaa awgeed, wuxuu ilfoojigo leh, iskaga eegayaa wixii bidhaan
rag ah, waayo wuxuu ka baqayaa in la arko oo hadii la garto dhegta
dhiigga loo daro. Balayax, goor casar gaaban ah, ayuu gaadhay jiidii
beeshu deganayd, dabadeedna isaga oo isqarinaya ayuu iska dhex
qaaday
kaymihii xooluhu daaqayeen. Wuxuuna ka baadhayey xoolaha, kaynta
daaqaya
wax leh, summadda Cudbi reerkooda, balse mar dambe ayuu arkay awr
raray
ah, oo qoorta ku leh laba farood iyo hareed, dabadeedna wuu gartay inay
awrta summadda lihi, ay tahay awrtii Cudbi reerkooda, aad buu u farxay,
ka dibna kayntii awrtu daaqaysay ayuu dhabbacday, markuu cabbaar meel
caro bataax ah, oo awrta u dhaw jiifay, ayuu mar dambe meel suryo ah ka
hallacsaday labo dumar ah, oo awrtii xadhkaha ka furfuraya, ka dibna
intuu soo dhukusay ayuu ku soo dhawaaday si uu wejiyadooda u
aqoonsado.

Wuxuu soo dhukusoba, hal cabbaar ah markuu u soo jirtay ayuu gartay
inay
labada dumar ah, midi tahay Cudbi dabadeedna wuxuu hoos u yidhi,
“Qoodhay iyo xerraday, waa iyadii”. Balayax, markuu Cudbi isha ku
dhuftay waxa jidhkiisa isku jebisay jidhiidhico farxadeed, madaxana waxa
ka fuqday qolof weyn, jawi nayaayiro leh, ayaa ku soo kordhay
dareenkiisa wuxuu isku qanciyeey inuu muraadkiisii gaadhay, cabbaar buu
soo dhukusay oo ku soo dhowaaday, markuu wax yar u soo jiray ayey
Cudbi

iyo gabadhii kale awrtii xadhkihii ka wada furfurteen oo intay labada dhinac isaga toociyeen dabada kaga dhaceen, una caraabiyeen xagaa guryihii Balayax, baadidii uu meesha dheer uga soo socdaalay aad bay ugu

dhowdahay laakiin lama hadli karo, oo wuxuu ka dabbin dhowrayaa gabadha

kale ee Cudbi la socota. Sidaa darteed, wuu iska dabo galay, isaga oo isqarinaya, dhowr jeer buu isku dayey inuu Cudbi keligeed is tuso laakiin uma suuro gelin taasi. Hase yeeshee, gabdhihii oo meel dhexe awrtii sii caraabinaya, ayey labo nin oo dhalinyaro ahi, ku soo lug dareen. Labada nin mid ka mid ah, ayaa degta ku sita qori rayfal ah, waxayna labadii nin awrtii la caraabiyeen gabdhihii, ka dibna afartii qof, kaftan iyo sheeko hallaasi ah, ayey bilaabeen, afarta qofna waa isku beel.

Balayax, kama hadhin ee qunyar buu daba dhukusayey jaaniskii uu quud darraynayeyna waxa dhiciseeyey labaddaa wiil ee hablaha ku soo biiray. Wuxuu dabo bidhaansadoba goor maqrib ah ayaa la dulyimi aqaladii awrtu ka dareertay, gel-gelin aqalada ka yar durugsan ayey hablihii awrtii ku dabreen. Dabadeedna afartii dhalinyarada ahaa, ayaa labo labo isugu qoorlaabay, oo haasaawaha falkiyey, iyada oo ay lababa geed yar dugsigii istaagtay. Balayax, wuxuu u soo dhowaaday Cudbi iyo wiilkii la taagnaa shaaca oo madoobaaday awgii ayaa u saamaxay inaan Balayax muuqiisa la

arag, isaga oo aad ugu dhow meesha ay labada qof taagan yihiin. Goortii ay cabbaar wada joogeen ayey Cudbi iyo wiilkii la taagnaa is macsalaameeyeen, oo midba gees u dhaqaaqay. Cudbi, waxay u dhaqaaqday

dhinicii aqalkooda oo qiyaastii u jiray ilaa boqol talaabo, balse inyar markii ay socod talaabo qaboobe ah, sii laafyootay ayaa Balayax oo sidii qof wax gaadaya cidhbaha ku soconaya, sanqadh tirasho awgeed, wuxuu soo

gaadhay Cudbi oo qunyar iska talaabsanaysa.

Dabadeedna intuu garabka bidix u shiisii ka taabsiiyey ayuu isaga oo hoos u xanshaashaqaya ku yidhi, “Naayaa Cudbi waa Balayaxe, maxaad sheegtay” Cudbi, intay bahal naxdin ah la faagatay oo yaabtay ayey

tidhi, “Waar waa nabade, xilligan xagee Alle kaa keenay, maxaadse doonaysaa, ma baadi doon baad tahay, cajeb!!!”. Balayax, oo doonaya inuu fursaddaa yar aad uga faa’idaysto ayaa intuu afka u soo dhoweeyey ku yidhi, “Naa mayee, baadi aan adiga ahayni igama maqnee, kaalay halkan ina yara jooji aynu iswaraysanee”. Cudbi intay dareen dhiilo leh, muujisay oo werwertay ayey tidhi, “waar heedhe, malaa waa lagu sitaaye, hadii lagu arko waa lagu dilayaaye, iminkana waa layna arkayaaye, bal anigaa kuu soo baxayee, geedkaa hoostiisa ku sii dhuumo oo yaan lagu arkin”. Balayax, wuu aqbalay. Markii ay dhaqaaqdayna wuxuu ka sii dabo tuuray “soo dhakhso, soo dhakhso”. Cudbi, iyada oo fajacsan oo dhabbanada haysa ayey gurigii tagtey, ka dibna intay dhabbanka iyo gacanta isa saartay ayey fekertay, waxayna maskaxdeedu cabirtay, halista uu Balayax ku suganyahay iyo ballantiisii ka dhexaysay, wadneheeda ayaa aad u shaqeeyey, oo si xawli ah ayaa dhiigeedu jidhka ugu wareegay.

Balse go’aankii ay gaadhi lahayd ayey jaanis u wayday, waayo hooyadeed dhool oo xerada adhiga ku jirta ayaa aragtay, iyada oo isla maqan ka dibna intay cod-dheer ku soo jeedisay ayey ku tidhi “naa maxaad la dheygagsan tahay, maad maqashan mareegta nagaga xidh-xidhid”. Cudbi oo

aad moodo qof laydh qabsaday, ayaa intay booday oo aqalkoodii oo madow

gashay, dabkii Afuuftey, markii uu dabkii ololeyna intay dhiilyar oo shan koonbo qaad ah soo qaadatay ayey caano maydhanaan geel ah, ka buuxisay, ka dibna intay dadkii iska eegtay ayey muska dambe ee aqalka ku xasaysay. Dababdeedna waxay bilowday maqal xidhxidhid, ido lis iyo adhi kala gurid. Balayax, wuxuu halkii dhabac-naadaba waqtigii baa ku dheeraaday, siduu xagga guriga u soo eegayey ayey indhihiis dheeraadeen. Rafasho ayaa ka dhamaatay, siduu marba isu moodsiinayey mududuulka dhirta, ee uu isu lahaa waa tan ee hanqalka ula boodayey, hadana isu nabayey.

Balayax welwelka iyo welafka haya awgii, intii fiidadowga ahayd ee xoolaha la maalayey, way kaga badnayd sanadkii ay kala maqnaayeen. Kadaloob iyo kuudud xumo ayaa jidhkiisu la curqay. Hase yeeshee markii ay caweys dambe sugtii la marayso, sawaxankii iyo sanqadhii guriguna yara naaqusantay ayuu is yidhi “armeeshan ciddina kuugu imman maysee,

maxaad yeeshaa, Alleylehe guriga ku dhowow”. Ka dibna intuu soo gurguurtay ayuu ku soo dhowaaday aqaladii. Reerku waa Afar Aqal oo waaweyn iyo Buul yar wuxuu iska gartay inuu buulka yari yahay buulkii Cudbi ka dibna isaga oo dhukusaya ayuu dhinicii buulka u dhowaaday. Markuu buulkii inyar u sii jiro ayaa gurguurashadiisii Adhyihii xerada ku jiray bahal didmo ah, rig ka siiyeen, oo musaska jiidheen. Dabadeedna inta jalaad iyo sawaxan la isla oogsaday ayaa dadkii aqalada ku jiray debedda u soo baxay oo la mooday in xoolihii bahal usoo dhacay. Cudbi aabeheed oo ardaa jiifay ayaa intuu fadhiistay oo kor u qayliyey yidhi “Naayaa Cudbi, waa maxay waxa adhyaha didiyey, ma dhurwaabaa, bal eeg”.

Cudbi oo iyadu fahamsan inaanu waxa Adhyaha didiyey ahayn, bahal ee uu

yahay ninkii Balayax oo soo gurguuranaya markuu aagsaday ayaa tidhi “Aabe bahalna muu arag ee wuxuu ka didayaa karbaashkaa geedka saaran”.

Ka ibna Cudbi oo werwersan oo qalbiga kaleh “Ilaah baa xaal astura” ayaa iyada oo waalidka yool habaabinaysa, si loo moodo inay seexatay, buulkeedii gashay. Isla markaana waxay isu diyaarinaysaa sidii ay Balayax banaanka ugu bixi lahayd, balse intii aanay bixin, ayaa waxa u yimi laba hablood oo doonayey inay la caweeyaan, halkaas ayey Cudbi fursadeedii kaga dhabaqday.

Iyada oo ay Cudbi iyo gabdhihii u yimi buulkii dhex fadhiyaan, ayuu Balayax gurguurasho ku yimi buulka dhiniciisa, dabadeedna intuu fadhiistay meel ku beegan, halkii ay Cudbi fadhiday oo uu sida tuugta sanqadha iska ilaaliyey ayuu ushii uu sitay ka dhexdusiyey buulka docdiisa, wuxuuna dhabarka ka taabsiiyey Cudbi oo sii jeedda, si uu isu ogaysiiso inuu joogo, oo ay ugu soo baxdo.

Cudbi markii ay dhengedu dhabarka ka taabatay wax dhaqdhaqaaq ah, ma muujin dareen eegmona iskuma deyin waayo way iska garatay cidda usha taabsiisay. Dabadeed, si ay Balayaxna jawaab u siiso, caweyska hablahana

u sii waddo oo ay isaga ilaaliso in la fahmo, waxay samaysay sheeko afjaaq ah, oo ay Balayax wax ugu sheegayso, ka dibna intay hablihii soo jeedisay oo hadalkii kor u qaaday ayey tidhi “Naa yaadheheen, caawa waan

idiin sheekaynayaaye idhegaysta. Beribaa waxa la yidhi wiil iyo gabadh

baa is jeclaa, waxayna ku ballameen inay is guursadaan, iyaga oo aan weli isguursan ayaa dagaalo dhaceen oo labadoodii beelood is dileen, dabadeedna colaaddii baa kala fogaysay. Markay sannad kala maqnaayeen,

ayaa wiilkii soo raadiyey gabadhii, ka dibna wiilkii iyo gabadhii waxay goor fiid ah, isku arkeen meel gurigii gabadha reerkooda u dhow. Ka dibna gabadhii waxay wiilkii ku tidhi, waan kuu soo baxayaaye, geedkaa hoostiisa igu sii sug, dabadeedna wiilkii baa intuu sugi kari waayey, buulkii gabadha docdiisa soo fadhiistay, ka dibna gabadhii oo hablo la sheekaysanaysa ul dhabarka kaga gujiyey, markaasay gabadhii wiilkii ku tidhi “inan yahow ma hedi ku wadday, mise hunguri ku wad, mise hammo ku

wadday. Haddii hedi ku waddo soo soco, raggaasi haku dilleene. Haddii hunguri ku wadana, mus dambeedka aqalka dhiisha caanaha ah, ee ku jirta

orod oo kala bax. Hadii hammo ku waddona, halkii lagugula ballamay ku noqo waa lagu imanayaaye”. Balayax, markuu fahmay inay hawraartu, isaga

u dhacayso, ayaa intuu dib u gurtay oo dhiishii caanaha ahayd, kala baxay muskii iskaga jebiyey gaajadii ba’nayd ee dhowrka godol ku qaadhsanayd, ka dibna wuxuu dib ugu noqday geedkii ay fiidadowgii ku ballameen. Xiliga hurdo dakharta la yidhaahdo, oo ah marka habeenka saddex meelood oo meeli tagto ayey Cudbi soo dustay, oo u tagtay Balayax

oo dugsigii ay ku ballameen yuurura, halkii bayna isku waraysteen. Intii aanay gudo gelin sheekadii waayo waayo iyo arrimihii guurka ayey Cudbi hadal canaan iyo calaacal isugu jira u qadintay Balayax, waxayna tidhi “miyaad waallantahay, maxaad halista intaa leeg naftaada u soo marisay, miyaadan ogayn in hadii ay imika walaalahay iyo ilmaadeeraday, ku arkaan ay ku sadqaynayaan. Gacaliye, goormaad naftaada sidaa u nacday. Ta kale

dhulkaad soo martay, waa dhulkii uu sida kashkaashka u jiifay Libaaxii dadyahanka ahaa, arladaa balaadhan ee aad soo martayna waa cidla ee sideebaad uga soo nabad baxday”. Balayax, intuu dhoolacaddeeyey ayuu yidhi, “Gacaliso, horta Libaaxaasi, tuu xalay ibadday kaagama sheekayn karo, waxaase igaga darnaa mas iga helay geed dushii. Khatarta aad sheegtayna, way ii muuqatay, laakiin waxaas oo dhan, waxbaa igaga

waynaa. Waana adiga waayo muxubada aan qabo ayaa i shidaysay.

Takale

Soomaalidu, waxay ku maah-maahdaa bahalka axdiga layidhaahdaa nin garanaya waa ku eebo nin aan garanayna waa ku ilaaq. Sidaa awgeed ballantii inoo dhexaysay ayaa col dad iyo dugaagba ii kaday waxaana doonayaa inaad caawa I raacdo, oo aad fuliso ballantii inoo dhexaysay”.

Cudbi, waxay isku dayday inay Balayax ku qanciso jawaab aan raacid degdeg ah ahayn, waxayna tidhi, “Walaal horta, been kumaad sheegin inaynu ballan weyn lahayn, balse waxa ka soo soka maray arin aynaan markii hore tirada ku darsan oo waxa dhacday colaad. Sidaa awgeed habeenkaa caawa ah, adiguna gurigayaga ku badbaadi maysid, anigana guri

aad leedihiin la igu gaafi maayo, ee talo iga hoo, ballan danbe aynu qaadanno oo aynu yarabax-naanino inuu waqtigu isbedelo, oo ay colaaddu qabowdo”. Balayax, kuma qancin hindisaha iyo talada ay Cudbi soo jeedisay, wuxuuna yidhi, “gabadh yahay intaas oo saymo ah, oo aan Alle I baddin, adiga awgaa ayaan isu soo badday, imikana labo hal kala dooro, in halkan la igu arko oo maydkayga la dhigo, oo ay weliba walaalahaa iyo aabahaa igu dhagarroobaan iyo inaad meesha iga raacdo, labadaa arimood,

wax iiga dhaxaynayaa ma jiro”. Cudbi, intay cabaar yara aamustay ayey goroda hoos u laad-laadisay oo dhulka dul hogotay. Dareen qiir leh, ayaa jidhkeeda maansheeyey, waxa qalbigeeda aad ugu duxay kalgacaylka

Balayax, la hoos joogo. Jacayl hor leh, ayaa Cudbi ku habsaday, duruufta meesha taal iyo kalgacaylka Balayax, soo labo dibleeyey ayaa beerkeedu hayn waayey, ka dibna qalbigeeda ayaa aad u damqaday, oo jacayl oodihiisa wata ayaa dabarka ku soo goostay, mililico jacayl baa dareenkeeda saaqay, waxay is tidhi, kor u eeg Balayax, ka dibna lingaxa hoose ee indhaheeda Eebbe quruxda ugu deeqay, ayey ilmo buurbuurani ragax ka soo tidhi, labada dhabban ayey shalmadii ay sidatay ku hadoodishay, iyada oo ay indhaheeda ilmadu ka qubanayso. Cudbi dibnaha

ayaa dubaaxiyey, ka dibna hadalkii ay odhan lahayd, ayey marba dib u callalisaa. Hase yeeshee, markii ay cabaar kala aamusnaayee, qalbigana iska waafaqeen ayey Cudbi tidhi, “Gacaliye, waxba kulama diidaniye, adigu tali”.

Balayax, wuxuu Cudbi u sheegay inuu awr dhexda kaga yimi, wuxuuna u soo

jeediyey inuu doonayo inay israacaan, oo intay awrka sii kaxaystaan Hargeysa galaan, dabadeedna ay Hargeysa oo walaashi degan tahay ku aqal

galaan, maadaama ay beelaha miyiga colaadi u dhaxayso, oo aanay Balayax

reerkooda u cuntamayn, guurka gabadh ay qabiilkooda isdirirayaan oo colaadi dhextaal. Cudbi, oo weligeedba beledka u xiiso qabtay ayaa hindisaha Balayax ku dhaliyey calool adayg hor leh ka dibna waxay u soo jeedisay inay habeen dambe, baqoolaan maadaama caawa, uu waagu ka baryeyo, oo ay habeenkii in yari ka hadhsan tahay. Cudbi, waxay Balayax, usoo jeedisay inuu dhabacdo kayntii ay galabnimadii awrta ka soo caraabisay, ka dibna way is macsalaameeyeen, wayna kala baqooleen, intay

isla tilmaan sadeen halka ay isugu imanayaan.

Balayax, maalintii oo dhan iskama rogin hurdadii uu seexday ilayn waa nin aan labo habeen iyo laba maalmood il iyo baal isu keenine, wuxuuna hoos jiifsaday geed cufan oo aan qofkii hoos gala ciddina arkayn. Cudbi, waxay iyana maalintii oo dhan ku jirtay tabaabushe iyo diyaar garow hoos hoos ah, oo ay ku xamaam urursanayso. Hase yeeshee, goor ay qoraxdu hadhka taagiisa ka degtay ayey Cudbi dhiil yar caano ka buuxisay, oo ay afka saartay kayntii Balayax jiifay, ka dibna intay qunyar soo sanqadh tiratay ayey dhiishii caanaha ahayd madaxiisa qotomisay oo qunyar dib uga laabatay, iyada oo aan hurdadiisii ka toosin. Dabadeedna goor dambe ayuu Balayax baraarugay, wuxuuna arkay dhiil caano ah, oo madaxiisa taal, ka dibna intuu labada dhabban qabsaday ayuu sida gafanaha uga soo go'ay waayo wuu iska gartay inay farsamadu tahay, tii Cudbi, oo aanay cid kale ciirsi ugu noqoteen kayntaa cidlada ah. Cudbi, maalintaa cidna lama talo ahayn, arinkeeduna wuxuu ahaa "Nin dameero wataa, dad la toy maaha". Dabadeedna goor ay casar gaabkii ahayd ayey Cudbi awrtii doontay, iyada oo qisdigeeda ugu wayni yahay inay fursaddaa uga faa'iidaysto, arimihii ka dhexda eyey,

Balayax, oo ay wixii ballamo ah ee ambabaxooda ku saabsan, soo

dhaad-dhaadaan. Cudbi, markii aymeel dhexe sii socotay ayey isla sheekaysatay, waxaana u muuqatay, inay galabta tahay, galabtii u dambaysay ee ay reerkooda awr u soo xerayso. Cudbi, waxay ahayd, 18-jir, inteeda ku maddorkar ah, waxay ahayd, quruxley, khaaliq jidhkeeda ka ilaaliyey xubin la naco. Midabkeedu waa maariin dhalaal, casaan xiga oo aad dusheeda ka subkanayso. Luqunta qotonka u baxday ee cabaadhyaha leh, gacmaha jalaqsan, dhexe madagta la moodo, kubabka cuddoon ee hilibku ilaa shidhixyada buuxo iyo wejigeeda jaah-qabitanka leh, ayaanay daymada jaleecdaa weligeed ka jeesanayn, waxaana Ilaahay ku mannaystay joog iyo jinni aanu qof arkaa abid ka xiiso goynayn. Cudbi, intay galabtaa indhakuul si qurux badan indhaha baalkooda ugu dhayday, ayey si yaable u soo talaabsatay, way timo tid-can tahay markaasay timuhu labada garab u kala dhaceen, xagga dambena jeenyaha hoos u dhaafeen.

Boqorka iyo dhaclaha ayey dhaxda ku kala rogtay, waxay soo xidhatay kabo baarashuud ah, oo jiiqdaahaya iyo labo dhidood shushubka dulucu isdulfananayo. Cudbi markii ay Awrtii xadhkaha ka soo furfurtay, ayey soo tuunbisay, oo ku soo beegtay kobtii uu Balayax joogay. Balayax, markii uu habsaday inuu qofka Awrti wadaa Cudbi yahay ayuu kobtii ka soo baxay, waxayna cabaar istaageen labo geed dhexdood. Inkasta oo aan labada qof hadal badani qabyo ka ahayn, hadana waa dad muxubbo dhextaaley, hal cabbaar ah, ayey hadallo guudmar ah iyo sheeko googoos ah isu dhiibdhiibeen. Ugu dambayn, Balayax ayaa yidhi “gacaliso orod Awrti caraabiyoo, ballantu waa inoo halkee iyo hadma” ka dibna waxay ku tidhi “Gacaliye, geedkii xalay miyaad ka ambanaysaa” maya ayuu yidhi, markaasay tidhi “Ammintuna, waa xiliga hurdo dakharta ee sardhada hore lagu jiree, reerka Adhyaha haka didin anigaa kuu imanayee”.

Balayax, intuu qoslay ayuu yidhi “waa inoo sidaase, hammuun ragna talada ku darso, oo soo dhakhso”. Dabadeedna Cudbi oo awel socod u holletay

oo

is dadabtay, ayaa intay soo jeesatay, waxay si kaftan ah, u tidhi
“Balayaxow, hay raagsan, ilayn adiga oo qudha, kuuma maqni, dadkuna
waa
badanyahay, si ay noqonna Allaa garan. Soomaaliduna waxay tidhaahdaa
hal
aan weli kuu dhalin ilmaheeda ha tirsan, shabeel aanad weli dillinna
hargihiisa ha baayicin”. Cudbi, way dhaqaaqday, iyaga oo dhoolo
caddaysay isku sii macasalaamaynaya, oo marba si xiiso iyo kalgacayl ku
dheehan yahay hoosta jaleeco yar isakaga xaddaya ilaa intay kala
libdhayeen. Cudbi, markii ay Awrtii gelgellinta ku xidhxidhay ayey
gurigii tagtay. Hase yeeshee Cudbi habeenkaa, Adhigii ay reerka u lisi
jirtay, may lisiin ee intay waxyar ka dhiidhiijiso ayey maqasha ku sii
daysaa, idaha iyo riyahaba, waayo waxay doonaysay inay xerada hore uga
baxdo, oo ay diyaar garowdo fiid caddeba.

Dabadeedna intay gal barkimo maryihii ka buuxisay ayey kiishkii maryuhu
ugu jireen meel guriga duleedkiisa ah sii dhigatay. Ka dibna buulkeedii
yaraa ayey gashay, oo ay iska dhigtay sidii wax seexday. Hase yeeshee
hurdo uma taallee, waxay sugaysaa inta dadku sardhada gelayo.

Dabadeedna

markii ay khuurada dadku isu yeedhay. Ayey intay kabaha suxullada
sudhatay, buulka gurradiisa ka dustay, ka dibna ay harqadi dharku ugu
jiray hore u sii qaadatay, iyada oo shamaaxinaysa ayey u tagtay Balayax
oo dugsigii ay ku ballameen kadalooba. Ka dibna, iyada oo aan juuq la
isu odhan ayaa degdeg talaabada loo boobay, weliba inta ay talaabadii
aamini waayeen ayaa inta tafaha la qabsaday, gucle orod la is barbar
yaacay. Arinkoodu wuxuu noqday cawralaay cago, geedweyn mooyaane,
geedyar lagamabaydhayo ee dushaa laga marayaa oo gediga habeenkii
fadhaq
boodka lagama nasin, iyaga oo ka baqaya inay raacdo ka daba timaado oo
la soo gaadho.

Maalintii dambena kadlaha lagama jimcin. Waxayse ugu darrayd, markii ay
Cudbi hooyadeed hiirtii waaberi toostay ee ay gabadhii tawday, ka dibna
intay afka gacanta saartay qaylo ka toshay. “ooo....oooo...oooo, waar ka
kacaay, reerka la dhacye”, markaas ayaa lagu soo yaacay waxayna u

sheegtay dadkii ku soo yaacay in gabadhii xalay la kaxaystay. Ka dibna, waxa la iswaydiiyey, yaa kaxaystay gabadhii. Balse cid loo aaneeyo waa la garran waayey, Balayax-na ciddina meesha ka filimayso. Islaantii Cudbi hooyadeed, waxay u tagtay gabadh gashaanti ah, oo ay Cudbi saaxiib

ahaayeen, waxay waydiisay inay wax tibaax ah ka hayso, dooc iyo dareentoona. Hase yeeshee inantii wax war ahi ugama soo kordhin, oo gabadhii ayaa iyada lafteedu cid ay tuhunto iyo meel ay u dacalsaarto garran wayday, waxayna tidhi “Nin Balayax ka dambeeya oo ay Cudbi sheeko

wadaag la yeelatoba, ma anigaa garranaya, Balayax-na maanta carradeenna

gabadh uma soo doonan karo”. Cudbi, hooyadeed, waxay doondoontay wax

raad ah, ka dibna waxay heshay raadkoodii, cabbaar bay raad gurtay dabadeedna, waxay aragtay inay cadceed u dhac afka saareen oo degmadii

ka dhexbaxeen, markaas ayey yiqiinsatay inuu Ninka gabadha kaxaystay Balayax yahay.

Dabadeedna, wixii Illaahay habbaar baray ayey dabada qabatay “Alle cidhibtaa go’day, meel darran lagu kaxee, fanto ku dishay, xiniinyo muldho, xoogga lax ha ku xiggan, iyo kelmado kale oo habbaar ah ayey dudubisay, waxayna gurigii ku soo noqotay, iyada oo dhurmaysa, dabadeedna wiil ay dhashay iyo niman ilmaadeeradii ah oo la jooga ayey u sheegtay in inantii Balayax la tegay. Ka dibna shan wiil oo doobab ah oo ay labona walaalo yihiin Cudbi, saddexna ilmaadeeryihiin, ayaa iyaga oo shan qori, laadlaadsanaya raadkii ku tibaday. Waxay dabo jabacsadaan oo ay kaymihii iyo kobihii ay xalay sii dhex jibaaxeen, hadba qoor ka raad guraanba, goor hadh soo korkii ah ayaa raadkii ka gedmaday, waayo waxay

ku soo baxeen dhul haaribban ah, oo aan jaanta laga arki karin.

Dabadeedna colkii raacdada ahaa markii raadkii u bixi waayey, may soo noqone jihadii raadku u jeeday ayey afka saareen. Hase yeeshee, waxay colkii raacdada ahaa socdaanba, raadkiina waa u bixiwaayey, labadii qofna meel ay jaan iyo cidhib dhigeen, way waayeen, isla markaana waxay

qoloda raacdada ahi ku soo dhowaadeen soohdintii ay labada beelood ee colaaddu u dhaxaysay iska gaaddaysan jireen. Dabadeedna cabsi baa gashay, iyaga oo ka baqe qaba inay is helaan korjoogaha beesha Balayax

Halkaa markay arini marayso ayey raacdadii, iyaga oo faro madhan dib isaga huleeleen, oo degaankoodii dib ugu noqdeen, iyaga oo harraad iyo gaajo bas beelay. Beeshii Cudbi lagala soo tegay gidiga maalintii, sheeko aan Cudbi iyo Balayax ahayn, lama hayn. Waxaana la isugu jiibanayey cayda iyo habaarka balayax, iyada oo dhaleecayn iyo jawaano cay ah, loo kiilayo. Cudbi hooyadeedna aflagaado iyo ceebayn balayax ku waajahan ayey ciil beel ka dhigatay, oo wixii afkeeda ku soo dhaca oo cay iyo habaar ah, uma hanbayso balayax. Hase yeeshee, lamaanihii isla caymaday ee Cudbi iyo Balayax waxay caraabe galabnimo ku tageen tuuladii uu Balayax awrka kaga tegay dabadeedna ismay taagine, intay awrkii faruurta qabsadeen ayey jihadii Hargeysi ka xigtay afka saareen.

Dhowr habeen ayey jidka ku sii jireen, wadada baabuurta waxay u marayeen taabsin durugsan, waayo waxay ka baqoqabeen inay cid Hargaysa ka timi oo baabuurta saarani garato, ka dibna ay arbushto. Waxay masaafo ku soo jiraanba subax hore ayey ku soo waabariisteen Hargeysa, ka dibna meel kale uma ay leexane, sayladda ayey dadka waydiiyeen, markii loo tilmaamayna way ku tibadeen waxayna markiiba awrkii u dhiibeen nin dilaal ah oo, kuwo sayladda ugu afdheer ka mid ah, markiiba gacanta ayaa la isu dhiibay, cabaar markii gacanta la is-hulaaqsiiyey, oo baayacaadu, weecweecatay, ayaa aakhirii gacanta lalulay, waxaana awrkii lagu faasaxay qiimo wanaagsan. Lacagtii awrka, markii daabaqadii iyo dilaalkii laga jaray, ayuu Balayax intii kalena go, uu sitay faraqiisa ku guntaday oo tuurta u ritay, dabadeedna lammaanihii Cudbi iyo Balayax, waxay u dhaqaaqeen dhinicii suuqa weyn ee Hargeysa.

Hase yeeshee, labadooda midna waxba kama yaqaan magaalo iyo shuquladeeda, waxayse sheeko kuhaystaan inay magaaladu leedahay tuug badan oo reer miyiga lacagta jebabkoodu ku jirta u soo shaqotaga.

Dabadeedna ninkii shaadh cad ee ka horyimaadaba waxay is yidhaahdaan,
waa kan tuugii la sheegayey, oo Balayax faraqii lacagtu ku guntanayd ayuu intuu dhuunta geliyo gacmihiisa mid ka mid ah, ku dhejiyaa, gacanta kalena dhengad uu sitay ayuu ku qabsadaa, markaas ayuu lacagta dul-hadhiyaa. Xaalkiisu Waa keeb la yuurur, oo hadiiba uu qof is yidhaahdo salaan, kama nabad galeen oo nabar baa kaga dhici lahaa.

Waxay

hiyiga ku hayaan macdaar suuqa ku yaal, oo uu leeyahay nin ay Balayax isku hayb yihiin, inta ay soconayaan waxay ka ballaadaymoonayaan daaraha

hareeraha ka xiga, oo ka fajaciyey, ilayn hore uma arage, sidoo kale waxkasta oo ay arkaan waa ku ugub, shaykastaana iyaga waa u udgoon, xataa dadka ayaa cadar-cadar u uraya.

Waxay la yaaban yihiin oo fajac iyo lama arag ku noqday, baabuurta yaryar iyo basaska. Waxa kale oo ay la yaaban yihiin guryaha isa saar-saaran ee dabaqyada ah, waxayna iswaydiinayaan sida dadka fuushani

u koreen. Markay wadada marayaan, waxay u dhowaanayeen dhinaca dumarka,

waayo ragga oo dhami, iyaga tuug buu ugu qoran yahay, laakiin may maqal

haween tuugooyin ah, oo wax xada ee rag uun bay maqlijireen. Balayax ayaa islaan waayeel ah, oo wadada maraysa, ku yidhi “eeyaa waa islaanta suuqu halkee buu ku qumman yahay”. Islaantii intay kor u eegtay oo garatay inuu yahay nin xero geel ka yimi ayey ku tidhi, “Suuqyadu, waa badan yihiin ee keebaad doonaysaa, ma suuqa oktoobar baad u socotaan, mise suuqa weyn”. Balayax, intuu layaabay, su’aashii lagu soo celiyey kalana sixi kariwaayey, suuqyada la sheegayo, ka uu doonayaa ka uu yahay

ayuu yidhi, “Suuqyadu ma dhowr baa miyaanu mid qudha ahayn, anaguse waxaanu doonaynaa, suuqa uu macdaarka ku haysto ninka la yidhaahdo ina

dhudhun adhi”, islaantii intay qososhay ayey tidhi, “Waar anigu dhudhun adhina garan maayee, halkee baad doonaysaan”.

Balayax, ayaa haddana islaantii ku celiyey su'aal kale oo yidhi,
“Mataqaanaa reeraha wadayaal, ee Reer dubad oogle iyo reer warfaa
xandule, meel ay ka degin yihiin magaalada”. Islaantii intay qosol kale
ku dhufatay ayey tidhi, “Waar heedhe, anigu waxanaad iwaydiinayso,
garran maayee, Reer-reer lahayne, reeruhu waa qabyaalad,
qabyaaladdana
waa tii la aasay, ee yaan askartu ku maqlin oo lagu xidhine, halkaa hore
ayaa suuqyahaye raggaa waydii , dadkan aad doonayso”. Waxayna
islaantu,
farta ugu fiiqday dhowr nin oo wadada dhinaca kale ka maraya, balse
Balayax, ilayn raguba waa kuwa uu ka cararayo ee iska eegayaaye, intuu
shakiyey oo mergiga dhiibiyey ayuu yidhi, “Caku magaalo rag yaraysee,
islaamahooduna waa ciyaal-ciyaal, oo waxwalba ciyaar iyo qosol bay ka
deyayaan, bal imika daya islaantaasi sida ay noo qaladday, anaga ayey
tuug iyo dhuq-dhuqle magaalo noo tilmaamaysaa, oo naleedahay
waxwaydii
ilaa sayladdii baanu hangool kaga horjoognay guntintaa go'ayaga ku
xidhan, markaasay naleedahay cagahaaga ku doono”.

Dabadeedna hore ayey isaga socdeen, iyaga oo baaladaymoodkiina sii
siyaadiyey, markii ay cabaar socdeen ee ay ka yara durkeen islaantii iyo
nimankii ay u tilmaamaysay, ayaa Cudbi oo iyaduna dhegaha didmo la
taagaysa waxa la hadlay Balayax. Dabadeedna wuxuu Balayax ku yidhi
“Naayaa Cudbi, ma arkaysay, qoodhay iyo xeraday, habarbaastaasi
marbay
saymo na gelin gaadhay, waa qofta noo tilmaantay shaadh cadde magaalo
habar dambe oo wax la waydiiyaana, halkaa haygaga hadho”. Cudbi, oo
daawashada magaalada iyo baalladaymoodkeedabaka baddin wayday
ayaa iyana
tidhi, “Dadka macdaarada haystaa, iyagaa isyaqaane, kuwaa wax waydii
oo
qof dambe oo meel iska maraya, ha inagula hadlin”. Balayax, waa runtaa
intuu ugu jawaabay bay socodkoodii iska sii wateen ka dibna waxay soo
gaadheen suuqii waynaa, oo uu dadku sida daadka usabbaynayo, oo sidaa
la
isu hor iyo dabo marayo, waxaynaka baqdeen, inay kala lumaan iyaga oo
la

tacajabsan dadkan xaddidhaafka ah, ee meesha ka buuxa, ka dibna si aanay

u kala lumin gacmaha ayey is qabsadeen, mararka qaarkood ayey ku soo beegmaan dariiq cidhiidhi ah oo ay dadku isjiidhayaan, laakiin iyagu ma ogola in ciddi u soo dhowaato, dabadeedna sidii ay dadka uga faaganayeen

oo ay marba meel koone ah, u eeganayeen, ninkii balayax-na dhengeda ula

goojinayey, ayey xaaladoodu noqotay waraabe shir yimi.

Balayax, waxa ku jira qabkii geel jirenimo, oo dadka magaalada jooga gebigood waa ka xaragoonayaan, wuxuuna hoosta ka leeyahay “Dadkan caydh

baa isu soo ururisay, hadii ay xoolo leeyihiin ma sidan ayey isugu meehanaabi lahaayeen, magaalo col ku deg maxay tuug iyo basar xumo haysaa”. Waxay socdaanba iyada oo ay indhuhu sare tageen oo waayey cid

ay wax waydiiyaan, oo ay miyir qab ku suureeyaan ayey soo gaadheen wadada gaadiidka badan ee badhtamaha Hargeysa, agagaarka sekedda qaydarka. dabadeedna intay meel qaloyar oo koone ah, istaageen ayey sida

sinimooga loo daawado u daawadeen baabuurta wadooyinka qaarba dhinac u

qaadayo. Ma aha markii u horaysay ee ay birguuxaysa arkaan, laakiin may arag baabuur aan siisow ahayn, oo ay arki jireen isaga oo mid qudha ama labo ah, oo waddo budusha miyiga siigaynaya iyaga oo halkii taagan oo ay wax waliba ku cusubiyihin, aadna u xiisaynaya wixiiay arkaanba ayey arkeen rag aad u yaacaya, oo ay caydhsanayaan askar badan oo dirays gashani iyo dumar qaylinaya. Askartu ninkii ay qabtaanba waxay ku ridayeen gaadhi madoobe dheere ah Askarta wax eryanaysa dabo socda.

Balayax, iyo Cudbi waxay maqleen “Waar ka carar-waar ka carar iyo istaag-istaag, hays dilin iyo ereyo kale”. Hase yeeshee, way iska dawadeen sida wax u socdaan arintuna wax kale maahee, waxa magaalada ka

socda raaf ba’an waxaana ragga loo raafayaa dagaalkii Soomaalida iyo Xabashida oo socda. Balayax, iyo Cudbi waxay la yaaban yihiin raggan

waaweyn ee isbaacbaacsanaya, waxayna moodeen shuqul magaaladu iska

taqaan. Balayax-na wuxuu kolba Cudbi ku leeyahay “Caku, magaalo dadkeedu, waa ciyaal-ciyaal, bal eeg raggan waaweyn ee yaac-yaacaya iyo

kuwan dharka cawlan ee eryanaya. Alla idin dayri, tolow ma camal kale ayey waayeen, Alla yaa nimankan geel kareeb ah raaciya”. Cudbi, oo iyana ku qoslaysa raggan isbaacsanaya ayaa tidhi; “Waar malaa waxani ciyaar maahee, way isdilayaan cajeb!”. iyaga oo halkii taagan, oo qosol la ildaran, moodayana in arintu tahay shuqul reer magaalka uun ku eg ayaa la isla soo gaadhay goobtii ay joogeen.

Balayax oo aan dareenba gelin, daawashana la dhacsan ayaa afar askari oo

xoogani dhab siiyeen, ka dibna wuu la dagaalamay” isaga oo moodaya reer

magaal dala,sanaya wuxuu is yidhi, ragga iska celi laakiin inta la isu dhuujiyey ayaa markuu isdhuf-dhuftay la garaacay oo ay askartii harraati iyo qori dabadii meel kasta ku jebiyeen, ka dibna markii ay fardhaqaaqda u diideen ayey sidii xabad hadhuudh ah dusha kaga tuureen gaadhi Elji ah. Cudbi, markii ay aragtay ninkii Balayax oo lagu degay ayey qaylo iyo muusanow ku dhufatay, weliba intaa kumay joogine askartii ayey la dirirtay oo gacanteeda ula tagtay. Hase yeeshee, askartii intay gabadhii Cudbi u gacan qaadeen ayey budhadh gaagaaban oo ay siteen sida durbaanka

ugu tumeen. Balayax oo aan isdhaqaajin karayn ayaa arkay gabadhii Cudbi

oo rag badani bukaasayaan.

Dabadeedna intuu hanqalka la kacay, ayuu isyidhi hinqo balse wuu isloodin kari waayey, markaasaa intuu wayraxay oo raftay ayuu muusanow iyo jibaad ku dhuftay, oo uu ciil dibinta qaniinay, balse askartii baa markay arkeen inuu dhaqdhaqaaqayo, mar kale ku gadhqabtay budhadh iyo

laad, ilaa ay ku ogolaysiiyeen sagxada gaadhiga. Lacagtii awrku, iyadu goor hore ayey laydha raacday, oo intay dacalkii ka furantay kala yaacday. Cudbi iyada oo si xun u dillan oo meeshii legdan ayey dumar ka

qaadeen. Balayax-na isaga oo gagabsan oo dhulyaal ah, ayaa baabuurkii la dhaqaaqay, oo la ka xeezey, balse markii dhexda la sii wado ayuu soo miiraabay.

Balayax, wuxuu arkay askar hareeraha ka fadhida iyo raggii kale ee raafka ahaa oo hinacyada ka xiga, wuxuu markaa isku dayey inuu askarta la diriro laakiin mid ka mid ah, raggii raafka ahaa ayaa balayax ku yidhi, “Waar aayar iska joogso, miyaanad garanayn waa raaf oo hadii lagu qabto la isma waalo’e naftaadana ha haligin waa askar oo naxariis malaha’e”. Markaas ayuu balayax, isyara nabay dabadeedna waxa la geeyey balayax iyo raggii lala soo raafay xerada birjeex ee Hargeysa, halkaas oo ay sii joogeen rag kale oo la soo raafay, ciidan hubaysan oo qoryo sita ayaa gaadh ka haya, waxaana lagu xereeyey balayax iyo raggii la socday hool weyn oo dusha ka dedan daaqadna aan lahayn isla markaana madow, oo aan laydh lahayn.

Dabadeedna inta albaabka loo gijiyey ayaa quful weyn lagu jebiyey gaadh culusna la saaray. Ninkii balayax oo ay askar guul wadayaal ahi haraati iyo qori dabadii ka dhergiyeen, oo aan waxba ka noolayn afka iyo sankana dhiig ka da’ayo, ayey raggii kale ee lala raafay u muujiyeen waxoogaa naxariis ah, iyaga oo uga waramay macnaha raafka iyo sida la isaga banbaaniyo dhibtiisa. Inkasta oo raga la soo raafay, aanu ku jirin nin qudha oo ikhtiyaarkiisa ku yimi ee mid walba isaga oo danahiisa wata khasab dhegta looga qabtay, hadana balayax waxa u dheerayd jidh dil loo gaystay, isaga iyo gacaladiisiiba sidaa awgeed, cadho iyo ciil awgii dibinta hoose ee balayax waxa ku yaalay nabaro aanay askartu ku dhufan, ee isaga oo aan is ogayn ayuu ciil daraadii foolasha isku goostay. Wuxuuna ku muusanaabayaa “Tolaay-tolaay, ma maantaa inan rag i ciilay oo

tani ii danbaysay”. Balayax, waxa kale oo uu ku calaacalay, tixdan geeraarka ah “Gacal nimaad ahaydeen hadii laga gol-roonaado oo gacantu, inay hiilisana kuu garnoqon waydo, illeyn waad gal-galataa sidii neef lagawracaye”. Labo habeen oo ay hoolkii ku xeraysnaayeen ninkii balayax, marqudha qumaati isuma taagin ee wuxuu ahaa dhulyaal garowyar, oo

raggii

raafka ahaa, lagu saydhsaydhiyeyna, isagu afkiisa ma gelin. Maalin sadexaad ayaa la bilaabay hawl lagu kala shaandhaynayo dadkii badnaa ee la soo raafay. Dabadeedna goor aroor hore ah, ayaa albaabka hoolkii ay ku xeraysnaayeen la balaqay. Nin qaro weyn oo xidhan shaadh iyo surwaal kaaki ah, koofiyadna madaxa ku sita iyo bastoolad suunka dhexda ugu xidhan kalulata, ayaa isaga oo ulyar ruxaya, oo talaabada kolba lug qunyar qaadaya, albaabka ka soo galay, waxaana dabo socda labo nin oo tuute sita iyo nin shandad weyn laad-laad sanaya. Raggii hoolka ku xeraysnaa ayaa lagu amray inay sarajoogsadaan, safaf isdaba gal ahna sameeyaan, way istaageen, waxaase fadhiga ku sii raagay Balayax, ka dibna hadal kulul ayaa lagu yidhi istaag, wuu istaagay isaga oo is tiilaya, tabcaana ah.

Dabadeedna inta buug kadinka loola fadhiistay ayaa nin walba lagu qoray magaca iyo da'da, fartana inta irbad lagaga muday, qadar dhiig ah laga nuugay ka dibna intii haysatay warqad dawladeed, ayaa gooni loo soocay, intii kalena inta makiinado la isugu dhiibay ayaa lagu yidhi, “Nin walowba ninka kale dhakada muudso, oo rubuc saace guduhi yaanu jirin nin madaxiisa tin lagu arki karaa”. Balayax, kama mid noqon ragga waraaqaha ku badbaaday ee wuxuu safka hore ka galayragga loo baahan yahay, timihiina waa laga mudh-xiyey. Markii raggii timaha laga mudh-xiyey ayaa loo qaybiyey dirays kaaki ah, waxaana lagu yidhi, “Nin walawoba iska bixi dharka aad xidhan tahay oo dirayskan degdeg u xidho”. Dabadeedna markii ay dirayskii wada xidheen ayaa nin garbo guduudan oo sarkaal ahi u khudbadeeyey wuxuuna ku yidhi “Saacadda laga bilaabo, waxaad tihiin ciidankii xoogga dalka Soomaaliyeed, waajibkiina koowaadna waxa weeye burburinta cadawga Soomaaliyeed iyo ilaalinta midhaha kacaanka barakaysan”. Sarkaalkaasi isaga oo gacanta kor u qaadaya ayuu hadalkiisii soo gebo gebeeyey; “Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed Aabaha Ummadda, macalinka kacaanka Jaalle Maxamed Siyaad Barre, ha nooloodo”. Ka dibna hanoolaado ayey ka daba yidhaahdeen.

Markii khudbaddii dhamaatay ayaa hoolkii dib loogu celiyey intii la xushay. Dabadeedna goor ay mirtii dhexe ee habeenimo tahay ayaa

albaabka

laga furay, ka dibna inta gaadh dable hareeraha laga joojiyey ayaa gawaadhi qafillan lagu daabulay, waana la dhaqaajiyeey iyaga oo aan garanayn jiho ay u socdaan. markii Hargeysa laga dhaqaajiyeey waxay fool u sii jeedeen lix caanomaal, intaa ay sii socdeena, waxa cunto u ahaa qasacad-qasacad kaluun ah oo hal mar loogu qaybiyey baabuurta guudkooda.

Hase yeeshee, ninkii balayax, cunis uu cuno, daayoo markii uu urtiisa dareemay kaluunkii ay cunayeen raggii hareerihisa fadhiyey ayuu hunqaaco la jeestay, wuxuuna matag ku mashaqeeyey meeshii uu fadhiyey iyo agagaarkeeda, balse mar dambe ayaa loo dhiibay fud-yar oo roodhi ah, kaas ayuu waxoogaa yara dhadhamiyey Balayax, waxa uu qalbiga ka leeyahay

meesha lagu socdaa fogaa, wuxuuna moodayey in Itoobiya lagu wado, waayo

muu moodayn in dhulka Soomaaliya gawaadhidu intaas oo hebeen u kala dhaxdo. Balayax, fadhigii badnaa ee baabuurka gurradiisa iyo jugihii askartu gaadhsiisay markii la raafayey, ayaa isu galay waxaana damqaday jidhka oo dhan. Isla markaana waxa tabcaan ka dhigay kuudud, mana hayo meel uu ku jimicsado oo ninba nin buu dhinaca ku hayaa, oo meel la kala qabsado ayaa la waayey waxay socdaanba goor fiid cawl ah, ayaa ciidankii raafka ahaa, irrida lagaga hooyey xero Ciidamada lagu tababaro, oo ku taal duleedka magaalada Xamar lana yidhaahdo xerada tababarka Ciidamada

ee Hiilweyne, halkaas ayaa sidii adhidamaan la xaraashayo inta ul dhabarka laga saaray, oo tiradooda la habsaday gawaadhida laga daadiyey.

xerada hiilweyne, waa xero aad loo ilaaliyo, waxaana xeradaa aalaaba lagu tababari jiray Ciidamada raafka ah, iyada oo ay joogaan askar aad u gacan kulul, oo u tababaran inay gacan bir ah ku qabtaan cidda u soo gacan gasha sidaa awgeed, waxay fasax u haystaan inay cidda u soo xero gasha judhiiba daawaha saaraan. Ninka sarkaalka ah ee xerada haystaana waa nin karbaashka dadka xerada soo gala iyo axmaqnimada garaado sare ku

qaatay, sarkaalka xerada haysta oo la odhan jiray gaashaanle Cali Kaajaaye, soo dhoweyntiisu waxay ahayd, istuur iyo fig haloo xidho. Markii raggii xerada la keenay loo tiriyeey gaashaanle Cali kaajaaye,

ayuu intuu berked weyn dul joojiyey ku yidhi, “Waaryaadha, nin walowba xiniyaha barkadan ku rido, meeshan xiniyo lalama dhexyimaadee”.
Hadalkan waxa loogu quusgoynayaa ragga cusub, waayo marka meesha lagu geeyo luguma odhanayo illaahay ka cabso ee waxa lagu odhanayaa taliyaha xerada iyo askarta wax tababaraysa ka cabso.

Balayax, wuxuu ahaa ragga aad looga jecel yahay xeryahaas oo kale, waayo wuxuu ahaa sagaal iyo toban jir caano geel ku koray, oo sida biciid barwaaqo jooga ugaamuray, jidhkiisuna si la yaqaan u dhisan yahay, oo aan la mid ahayn, dhalinyarada magaalooyinka laga qab-qabtay ee shaaha iyo sigaarku siinaddii ka saaray. Sidaa awgeed, Balayax wuxuu ahaa ninka ugu mudakarsan Ciidanka uu ka mid ahaa. Labo nin oo colkii Balayax ka mid ah, ayaa subaxnimadii damcay inay baxsadaan, kuwaas oo intay gidaarka ka daateen yaacay. Hase yeeshee, askartii koore gaadhka ahayd, ayaa arkay ka dibna intay sida cawsha u toogteen ayey maydkoodii xerada ku soo dhex tuureen, waxaana la daawadsiiyey ragii kale, si ay ugu cibro qaataan, oo aanay baxsi u hawaysan. Ninkii Balayax ayaa naxdin iyo anfariir qaaday, ka dibna saskii uu qaaday awgii ayuu xididkii raganimadu ka xuubsiibtay, waxayna talo kaga ururtay inuu sidii awr koran ah, meel iska dhigo xanaaqa iyo dareenkii qoodh-nimada, oo uu saacaddaa laga bilaabo sidii geenyo qoofallan ugu dhego nuglaaddo amarada iyo siidhiga askarta xerada haysata. Balayax, habeenkii uu hiilweyne ku hoyday waxa u kowsaday tababar lixbilood ah, oo uu ku dhamaystay xaalad adag oo jiif iyo joogba loo diiday, waxayna habeen iyo maalin u ahayd isaga iyo colkiisii, raqle iyo sarajoog.

Balayax, reerkoodii way waayeen, ka dibna baadidoon iyo raacdo ayey maalamo badan ku mashquuleen, waxaana u dhamaaday daal iyo diif. Hase yeeshee, raq iyo ruux meel uu jaan iyo cidhib dhigay, waa la waayey. Hooyo kor dahab iyo hablaheedu, wax dhex ka kaaja waxay haysteen Balayax, waayo xagga bahnimada keligii baa u rag ah, sidaa awgeed hooyo kor dahab iyo hablaheedii, way samri waayeen oo sidii ay u barooranayeen ayaa u ilmadu labada xiribood ee indhaha iyo dhabanada caaryeysatay.

Gabadh magaalada Hargeysa lagu qabay, oo ay balayax walaalo yihiin ayaa

sidii ay magaalada ugu baadigoobaysay, gurigeedii u soo hoyan wayday, waxayna nafteedii iyo maalkeediiba ku dhamaadeen raacdadii balayax.

Hase

yeeshee, raacdadii, waxa lagu helay Cudbi oo ahayd qofkii indho garad ugu dambeeyey balayax, waxaana laga helay Cudbi guri ku yaal xaafadaha

shacabka Hargeysa oo uu lahaa nin sarkaal ahi, gurigaas oo ay ka ahayd adeegto, reerka u shaqaysa. Cudbi, markii ay yimaadeen ehliyaddii balayax, ee ay waydiiyeen, ayey ilmadu ka soo dareertay oo ay baroor la jeesatay, waayo marnaba nolol ku tirin mayso oo waxay ogayd, wixii jidhkiisa ku dhacay, ismana lahayn wuu ka kacayaa nabaradiigaadhay.

Cudbi, waxay dadkii raacdada ahaa ku tidhi, “Balayax, baadidiisa nolol haku raadinina ee maydkiisii meesha la geeyey uun raadiya, waayo askarbaa intay suuqa ku dishay, maydkiisiina gaadhi ku ritay. Askarta Balayax dishayna, waa kuwa anigana nabaradaa igu yaal igu dhuftay”.

Warkaa markii lahelay, ayaa geeri lagu tiriyey Balayax, axankiisii iyo agaskiisii ayaa la qalay, mowliidna waa la dhigay waxaana lagu xisaabiyey qoonka aakhiro loo dhigay. Balayax, carbiskii wuu dhamaystay, wuxuuna ka soo laacay lixbilood oo car-caraaf iyo kadeed ah. Balayax, iyo colkiisu mudadii ay tababarka ku jireen, waxa socday dagaalkii Itoobiya iyo Soomaaliya. Hase yeeshee, dafcaddii balayax, waxa carbisku u xidhmay ayaamo ciidamadii Soomaalida ee Itoobiya la dagaalamayey la soo jebiyey, oo ay dib uga soo baxeen gudaha Itoobiya oo ay markii hore aad ugu jiciirteen. Sidaa awgeed, ciidamadii Balayax ka mid ahaa oo markii hore qorshuhu ahaa in marka tababarku u dhamaado lagu shubo jiidaha hore ee dagaalka, waxa markii ay ciidamadii Soomaaliya ka soo baxeen Itoobiya, lagu qayb-qaybiyey qaybihii iyo saldhigyadii Ciidamada, iyada oo urur walba meel loo bedelay balse ururkii uu balayax ka tirsanaa, waxa lagu reebay xeradii Hiil-weyne. Ragga ay balayax isku urruka noqdeen, waxay u badnaayeen dhalinyaro laga soo ururiyey jeelasha

oo dil, xabsidaa’in iyo sannado kala duwan oo xadhig ah ku xukunnaa, kuwaas oo la doonayey in looga faa’iidaysto xaaladdii dagaal ee taagnayd. Sidaa awgeed ururkii balayax, si adag ayaa gacanta loogu qabtay, waayo raggaa ayaa laga baqayaa inay baxsadaan, waxaana amar

lagu

bixiyey inaan wax fakaag ah loo ogolaan. Ragga intooda badanina waxay ahaayeen dibjiro iyo qaar an ehel lahayn, sidaa awgeed waxa lagu ababiyey in aabaha keliya ee ay leeyihiin uu yahay Siyaad Barre. Balayax, wuxuu noqday nin edeb badan, tababarkii la siiyeyna si fiican u qaatay oo laylyamay. Sidaa darteed, wuxuu noqday askariga xerada ugu dishibiliinka wacan. Sidoo kale, muuqaalka askarinimo iyo hanaanka diraysqaadka, ma jirto cid xerada joogta oo ku haysataa. Hal sanno, markii ay xeradii hiilweyne ku dhamaysteen, balayax iyo colkii ay isku ururka ahaayeen oo aanay intaa mar qudha xoriyad iyo maalin fasax ah, midna helin ayaa subixii dambe ururkii balayax la qaybiyey, oo inba meel lagu tuuray. Hase yeeshee, balayax wuxuu ka mid noqday koox xul ah, oo lagu qoray xero tababar oo la yidhaahdo Bali-doogle. Halkaas oo ay tababar hor leh looga bilaabay, waxayna xerada balidoogle ahayd, meel ragga la geeyo lagu siiyo carbis adag, si ay uga mid noqdaan ciidan aad looga baqan jiray, oo la odhan jiray kamaandaws. Ninkii Balayax, mar kale ayuu kow ka bilaabay carbis dab iyo naar ah, marka la eego xaaladda carbiska ballidoogle, carbiskii Hiilweyne, wuxuu ragga u ahaa caano iyo subag lagu marmarinayo. Jirabkii tababarku, wuxuu gaadhay heer ragga baarashuud la'aan diyaaradaha lagaga soo daadiyo. Laba sanno iyo badh, oo cir alla ka dhashay ayaa balayax, waaguna ugu beryaayey, gabalkuna ugu dhacayey, xerada gudaheeda, waxayna 24-ka saac ee habeenka iyo maalinta u ahayd, qac iyo baf, aan fakaag lahayn. Balayax, wuxuu carbiska la galay hurrin 120 nin ah. Hase yeeshee, waxa carbiskii ka soo baxay 60-nin, halka ay intii kale u qaybsameen wax jajabay, wax tababarkii ka maandawska ku dhacay oo xeryohoodii lagu celiyey iyo wax kuba dhintay, oo wadnuhu istaagay ama halbowle go'ay. Balayax, lixdanka hurrintoodii ka soo hadhay oo ahaa intii geed labka ahayd, ayuu nambarkow ahaa, wuxuuna noqday wiil xerada ballidoogle ka sheeggan oo caan ah. Balayax, waxay tababarkii ballidoogle, ku saaxiibeen nin Raage la odhan jiray, oo Reer Hargeysa ahaa. Raage, waxay Hargeysa isku yiqiineen nin Balayax walaashii qaba, taas ayeyna markii u horaysay isku aqoonsadeen.

Balayax, mudadii uu tababarka balidoogle ku jiray, waxa dalkii Soomaaliyeed ka dhacay isbedelo iyo dhacdooyin waaweyn, oo saamayn ku

yeeshay arimihii siyaasadda, nabad gelyadii, shucuurtii dadka iyo jawigii nololeed. Waxaana ka mid ahaa, waxyaalihii dhacay inqilaabkii dhicisoobay ee kornayl Cirro, saraakiil la laayey, kacdoonno dadweyne iyo dad rayid ah oo la xasuuqay. Waxa daciiftay awooddii taliskii Milateri ee Siyaad Barre Madaxda ka ahaa, waxa yimi tafaraaruq saameeyey meel walba. Markii ay ciidamadii Soomaalidu ka soo baxeen dhulkii Itoobiya laga qabsaday, waxa saraakiishii iyo ciidamadii Soomaaliyeed, soo food saartay mooraljab iyo tamar daro, taas oo keentay inay ciidamadii Am-xaaradu, ka soo talaabaan xuduudii u dhaxeysay Itoobiya iyo Soomaaliya, oo ay qabsadaan meelo ka mid ah, dhulkii Soomaaliyeed sida Galdogob iyo Balanballe, oo ku yaal gobolada dhexe ee dhulkii Soomaaliyeed.

Tafaraaruqii ku dhacay ciidamadii Siyaad Barre, waxa uu sababay inay cutubyo ciidamadii Soomaaliyeed ka mid ahi, dib ugu goosmaan Itoobiyadii ay la dagaalamayeen oo la saaxiibaan. Waxa samaysantay Jabhadii SSDF, ee

uu Col: cabdilaahi Yuusuf, hogaanka u qabtay, ka dibna xoogagii jabhadda SSDF oo ka soo jeeda dhinaca Itoobiya oo taageeri jirtay, ayaa dagaalo ka fool-kafool iyo gaadmo isugu jira, si joogta ah ugu haysay ciidamadii taliskii Siyaad Barre. Waxaa dhamaatay dabayshii colaadeed iyo dareenkii midaysnaa ee ku jihaysnayd Itoobiya. Waxa meesha ka baxday qiiradii dadka lagu dagaal geliyey iyo muxubadii dagaalka loo hayey.

Subax-subxaha ka mid ah, ayuu nin sarkaal ahi u khudbadeeyey askartii balidoogle ee uu Balayax ka mid ahaa, isaga oo ku guubaabiyey inay ka hortagaan, wax uu ugu yeedhay qudhmista iyo kuwa dabo dhilifka u ah, cadawga ummadda Soomaaliyeed, waqtigaa dagaal ka socday gobolada dhexe

ee dhulkii Soomaaliyeed. waxaana halkaa ku dirirayey ciidamadii Siyaad Barre iyo jabhaddii SSDF, oo ay ciidamadii amxaaraduna taageerayaan. Sidaa awgeed sarkaalkii u khudbadaynayey colkii balayax, wuxuu amar ku bixiyey in guutadii uu balayax ku jiray loo qaado goobta dagaalku ka socdo. Hase yeeshee, intii aan la rarin guutadii ayaa la sii qooro gooyey rag gurmada ah. ragii la xulay oo ahaa 13 nin oo uu Balayax ku jiro waxa lagu amray inay soo qaataan heeryadii dagaalka, ka dibna markii ay soo xidheen gibishii Ciidanka kumaandawska ayaa la saaray

gaadhi ah noocii TM-ka la odhan jiray. Gaadhigaa waxa laga buuxiyey joonyado bariis iyo sonkor ah, ka dibna waxa kooxdii askarta ahayd lagu amray inay degdeg u gaadhsiiyaan goobta dagaalku ka socdo, iyada oo loo sheegay inay taakulo degdeg ah tahay.

Baabuurkii TM-ka ahaa oo ay dusha ka saaran yihiin unugtii balayax ku jiray ayaa afka saaray jiiddii dagaalku ka socday ee goldogob iyo Ballanballe. Waxay socdaanba markii ay aagga dhuusamarreebeed, soo waydaarteen ayey soo galeen arlo aan xasiloonaayn oo ay ka jirto cabsi iyo gebogebo colaadeed, iyada oo ay soo gaadheen jiido ay jabhadii SSDF, ka ugaadhsato oo ay had iyo goor ka dhacaan dagaalo dhuumaalaysi ahi. Unugtii iyo baabuurkii ay wateen, goor barqo iyaga oo waxoogaa dhaafay tuulo la yidhaahdo Guroceel, oo ay marayaan meel ay wadadu goolad ka gasho, dhinaca galbeedna ay kaynweyni ka xigto, ayaa askartii oo iska faraxsan, iskana sheekaysanaya oo aan burkaba belo ka filayn, waxa mar qudha dayaamay gariir xoog leh, qiiqa ayaa cirka isku shareeray, gaadhigiina intuu cirka ubooday ayuu xagga kale iska rogay oo digaandigaha noqday. Arintu wax kale ma aha ee gaadhiga waxa la kacday miino isa saar ah oo ay wadada dhigeen rag ka tirsan jabhadii SSDF, weliba ragga miinada dhigay meel fog ma jiraan ee waxay fadhiyaan kayn wadada qarkeeda ah oo ay ka ilaashanayaan miinada iyo ciddii ay la kacdo. Sidaa awgeed, markii ay giga maqleen ayey ka soo kaceen kobtii ay ku gabanayeen, oo ay u soo dhaqaaqeen dhinicii wax ka dhaceen iyaga oo rasaas iska soo horaysiinaya ka dibna waxay dul yimaadeen baabuurkii oo wadada dul-hawaara, oo digaan digaha noqday, bir laqaatona aan lahayn iyo unugtii askarta ahayd oo wadada hareeraheeda wadhan, iyaga oo noqday wax dhintay iyo wax dhaawacmay iyo kuwo qayabsan.

Balayax iyo kabadadii sonkorta ahayd ee uuku dulfadhiyey, ayaa markii qaraxu dhacay dalool weyn oo ka samaysmay sagxaddii baabuurka iskala dhexdusay, ka dibna jawaanadii raashinka ahaa ayaa balayax qariyey waxase u banaanayd meel yar oo uu hawada ka qaadanayey, waxna ka arki karayey. Halkiisaa ayuu sidii wax gabanaya ku noqday, oo beerka dhulka ku hayey isaga oo aad u baqaya. Balayax, meeshii yarayd ee uu

banaanayd

ayuu ka khaawisayey nimanka soo socda ee rasaasta soo ridaya, wuxuuna moodayey ciidankii xabashida. Hase yeeshee, markii ay soo gaadheen ee ay

dulyimaadeebn, ayuu maqlay iyaga oo afsoomaali ku hadlaya, ka dibna wuu

khaawisay oo wuxuu arkay niman maryo cas-cas oo Somali ah. Nimankii jabhadda ahaa, nimankii dhaawaca ahaa ayey dhaawac tireen oo laayeen, ka

dibna Balayax markii uu arkay saaxiibadiisii dhaawaca ahaa oo la dhaawac tiray ayuu baqdin daraadeed qaboobay, wuxuuna ku dhabacday halkiisii. Nimankii jabhadda ahaa, markii ay balayax mooyee askarta intii kale nafta ka wada jareen ayey kayntii ay ku jireen kala soo baxeen baabuur ay wateen, ka dibna raashinkii meesha yiil ayey ku daabuleen.

Balayax, raashinka la daldalanayo ayaa gabood u ah, oo uu kaga badbaaday

rasaastii qudha lagaga jaray saaxiibadiisii dhaawaca ahaa. Hase yeeshee, marka raso la baneeyaba, Balayax waa lagu sii dhowaanayey iyada oo ay balayax marba marka ka sii dambaysa naxdin awgeed, naftu ku sii dabo yaraanaysay. Iraadada Ilaahay, nimankii jabhadda ahaa markii ay raashinkii intii kale gurteen ee ay u hadhay rasadii u dambeysay ee Balayax hoosta kaga jiray oo aan toban kab-dadood ka badnayn ayey maqleen guux iyo siigo ku soo dhow, ka dibna intay qayl-qayliyeen oo dhegaha taageen ayey yidhaahdeen waar ina keena gurmada cadow baa inagu

soo dhoweh. Dabadeedna intay gaadhigoodii kaxaysteen ayey yaaceen oo kayntoodii dib u galeen. Ninkii Balayax, ayaa qoorta la soo yara baxay oo hareeraha eeg-eegay, balse saaxiibadiisii oo wada mayd ah, mooyaane cid kale ayuu arki waayey. Dabadeedna intuu kabdadihii dhinaca isaga legday oo uu qorigiisana la soo baxay ayuu orad cagaha wax ka deyey. Balayax wuxuu u cararay dhinicii kale, guuxii soo baxayeyna ma sugin, ee orod buu miciinsaday. Balayax, nasiib wanaag, qaraxii miinadu wax dhaawac ah ma soo gaadhsiin ee wuu badqabaa. Balayax, markii uu ilaa meel fog cararay ee uu wax cid ah oo dabasacota ama hareer socota arki waayey, waxa soo gashay waxooga nayaayiro ah oo u bedeshay naxdintii iyo

quustii nololeed ee uu ku sugnaa daqiiqado ka hor. Balayax, markuu isku habsaday inuu meel cidlo ah u baxay waxa gashay yididiilo farxadeed, waayo waxa u ahayd fursadii u horaysay ee ku baxsado muddo afar sano ku

dhow, oo uu ku jiray xaalad aan fakaag lahayn.

Sidaa awgeed, gidiga maalintaas oo dhan wuxuu ku jiray orod fadal dheere ah oo aanu mar ka jimcin isaga oo sidii cawl xabadi dul-martay dhababaco dhegaha nabaya. Markii gabalku dhacay, ayuu orodkii ka xiiq tirtay oo ku bedelay socod gucle ah, ka dibna wuxuu jeedaba goor ay saqdhax tahay ayuu kob cidlo ah, cabaar seexday, hurdada kuma raagin ee markii waagu soo guduutay ayuu ka booday. Afar caano maal, markuu raqle ku jiray, ee uu uga firdhanayey meel sanqadhi ka baxayso ayuu maalintii dambe ku soo

baxay waddo baabuurto marto, waxaana waqtigaa marayey nin oday ah, oo

Reer miyi ah, dabadeedna Balayax wuxuu go'aansaday inuu iska calool adaygo oo ninkaa waraysto, isna tuso oo aanu iska qarin. Balayax, wuxuu sitaa heeryadii askarnimo ee uu Balidoogle kala yimi, sida dirays madow oo tuute ah, koofiyad bir ah, boosh iyo qori. Waxa kale oo intaa u dheer diif iyo dhibaato dushiisa ka muuqata sidaa awgeed qofkii uu cidla kaga soo baxo, waxa gelaya cabsi.

Balayax odaygii markii uu waxyar u soo jiray ayuu ku yidhi “Waar istaag”, ka dibna wuu istaagay, waa oday weyn oo tusbax uu ku werdiyayo gacanta ku sita. Ka dibna balayax, wuxuu yidhi, “Salaama calaykum” odaygii baa u celiyay “Wa calaykuma salaam”. Balayax, wuxuu hadana yidhi

“Adeer waxaan ku waydiiyey wadadani xagee bay tagtaa” odaygii “Waa wadadii Buurtinle tegi jirtay”. Balayax, “Adeer waxaan kale oo ku waydiiyey Hargeysa xagee bay inaga xigtaa”. Odaygiibaa yaabay oo gartay inuu yahay askari fakad ah, wuxuuna u celiyey “Waar maandhe, Hargeysi dhulka kama dhowa’e xagee baad adigu ka timi”. Odaygu wuxuu ka mid ahaa,

reeraha ku dhaqan degaamada ay jabhaduhu ka soo jeedaan, ee ay colka yihiin Ciidamada Siyaad Barre. Dabadeedna cabaar baa la iswaraystay, oo balayax wuxuu odayga uga waramay sidii dhulkiisii kaga yimi iyo

dhibaatooyinka uu soo maray, odaygiina wuxuu balayax u sheegay sida uu Hargeysa ku tegi karo iyo halka uu u marayo, intaa ka dibna odaygii intuu Balayax kaxeeyey ayuu reerkiisi geeyey, oo cunto ka siiyey.

Dabadeedna odaygii markuu Balayax gaajadii ka reebay ayuu dirayskii askarta ka bedelay oo maryo caadiya siiyey. Odaygaasi, Balayax kabihii askartana waa ka bedelay oo kabo kale ayuu siiyey, intaa markuu u qabtay ayuu qorigiina ka iibsaday, oo uu ka siistay saddex boqol oo shillin Somali ah (300ShSl.) dabadeedna intuu ka xeeeyey ayuu meel waddo ah, baabuur ka saaray, wuxuuna darawalkii baaburka ku yidhi, “Ninkaa waxaad dhigtaa koontaroolka Buurtinle, sokodiisa” sidoo kale, odaygu wuxuu Balayax, kula dardaarmay inuu baabuurkasta marka uu koontaroolka u dhowyahay ka dego oo uu u lugeeyo dhinaca kale ee magaalada kasta, ilaa

inta uu Hargeysa gaadhayo si aanay askartu u ,garan. Balayax, taladii buu qaatay, oo ku dhaqmay, waayo inkasta oo dhar shicib lebis-naa oo aanay ka muuqan wax calaamad askari ahi, hadana marka aad wejigiisa eegto waad garanaysaa inuu askari soo baxsaday yahay, waqtigaana askarta

fakadka ah aad baa loo baadhi jiray, hadii la qabtana ciqaabtiisa dil baa ugu yaraa. Balayax wuxuu u dhashay nin cas. Hase yeeshee, duruuftii uu maray ayaa midab-doorsoon ku ridday, oo wuxuu noqday dugul madaw, labada indhoodna waxay noqdeen kabbodhiig ah, wejigiisa farxad iyo dareen caadiya lagama akhrisanayo, waayo wuxuu soo maray xaalad uu ku

farxad guuray, garbaha iyo luqunta ayaa tиграarmay, talaabadiisuna gaardis waxba kama duwana, labada suxul ee gacmaha iyo labada ruug, waxa

ka fuushay qolof adag, oo ay keentay xamaarashadii tababarka.

Wuxuu u muuqdaa nin duni cusub ku soo biiray, oo isfahamka dadka iyo dhaqanka noloshu, waa ku dagam-dagam. Wax badan buu illaaway, waxaanse

marna ka bixin Cudbi, wuxuuna qalbiga ka leeyahay “Cawo iyo ayaan badanaa qof mar qudha indhihiisu qabtaan Cudbi”. Balayax, haraadka iyo hamuunta uu dadkooda u qabaa waa bilaa qiyaas, dhuumaalaysi iyo isban-baanin qayral xad ah, ayuu ku soo dhaafay jid dheer, askartii uu

ka baqayeyna Alle ma tusin. Balayax, wuxuu socdaba goor fiid ah ayuu soo galayay Hargeysa, wuxuuna markii u horaysay galay Hudheel cunto. Markii uu kursiga badhida la helay ayaa mudalabkii hudheelka soo dul joogsaday oo waydiiyey, waxa uu doonayo, ka dibna Balayax, wuxuu mudalabkii weydiiyey qiimaha raashinka. Balayax mudalabkii baa u kala sheegay, qiimaha cuntada ka dibna Balayax isaga oo jeebkiisa ku xisaabtamaya ayuu

yidhi hilib ii keen, waxaana haysay bahal gaajo ah oo ku raagtay, waayo ilaa maalintii la raafay ma helin oon xoolaad oo hagaagsan, mudadii uu baxsiga ahaa ee uu jidka ku soo jirayna dhadhamo mooyaane, mar qudha cunto uu ka gaajo beelo uma fadhiisan. Sidaa awgeed saddex wasladood oo

hibil ah, ayuu lafahoodii miiskii hudheelka kaga tagey, markuu gaajo beelay ayuu kacay oo lacagtii iska bixiyey. Dabadeedna markuu lacagtii dhiibay ayuu ninkii hudheelka haystay si asluub leh u waydiiyey, inuu u tilmaamo cid haybtooda ah, oo meelaha degan (isaga oo u sheegay Ekiskiisa), ka dibna nasiib wanaag ninkii hudheelka haystay ayaa farta ugu fiiqay dukaan ka soo horjeeda oo ku yidhi, “Dukaankaa ayaa ah heybta aad sheegtay ee u tag”. Wuxuu soo galay dukaankii, Qoladii dukaanka lahayd, hore uma garran Balayax, laakiin markii ay haybsadeen ee uu inaayadiisa sheegay ayey garteen. Ka dibna intay cid ku dareen ayaa lala raadiyey gurigii walaashiisii magaalada lagu qabya, oo Ruqiya la odhan jiray. Goor caways ah ayey Balayax iyo wiil lagu soo daray isa soo hortaageen oo gargaraaceen albaabka gurigii Ruqiya. Afar sano oo wax yar

la,baa laga joogaa markii Balayax samir iyo iimaan laga qaatay, ee axankiisa iyo agaskiisa la cunay, looguna faataxeeyey inuu Ilaahay janadii ka waraabiyo, wuxuuna reerkooda iyo ehelka kaleba ugu tirsan yahay maytida aakhiro. Ruqiya, waxay ahayd gabadhii ugu baadidoonka badnayd, waxaana raacdadiisa ka soo gaadhay dhib badan oo naf iyo maalba

leh, marna xisaaabta ugama jirto Ruqiya waxaad dib dambe u arkaysaa walaalkaa Balayax, taasi waa dunida oo si kale la yidhaahdo. Balayax iyo wiilkii lasocday, waxa albaabka ka furtay gabadh yar oo Ruqiya dhashay, waxayna tidhi “Waa ayo”, ka dibna wiilkii kale ayaa yidhi adeer gurigu, ma yahay gurigii Ruqiya, “Haa” bay yartii tidhi, markaasay ku yidhaahdeen, Ruqiya ma joogtaa markaasay yartii tidhi, “Haaye soo

dhaafa”, ka dibna yartii intay dib u carartay baa tidhi “Hooyo labo nin baa ku doonayee, kaalay la hadal”. Ruqiya, waxa waqtigaa la fadhiya labo gabdhood oo kale, oo ay Balayax walaalo yihiin iyo eedadii. Ruqiya, iyada oo aan soo kicin ayey qolkii ay fadhiday kor uga dhawaaqday oo tidhi, “Maxay yihiin nimanka goortan I doonayaa, waa kuwama” Balayax, oo markuu dhawaaqeedii maqlay jidh dhico saaqday ayaa ku jawaabay “Waa walaalkaa Balayax” ka dibna kuligood intay marqudha kor u wada boodeen, ayey dhamaantood oo dumarkii oo dhami kor ugu qayliyeen “Yaa Balayaxaa!!!), mar labaad ayuu yidhi, “Haa waa Balayax”.

Balayax codkiisu, waa isbadelay oo gabdhihii walaalihii hore waa u garan waayeen laakiin eedadii ayaa markiiba codkiisa garatay, ka dibna intay labo qof ka sokeeyey soo jiidhay ayey haw soo tidhi, oo intay albaabkii wada balaqday, ayey iftiinka laydhka ku eegtay, saa waa laftiisii. Dabadeedna islaantii eedadii markii ay habsatay inuu Balayax yahay ayey dug ku tidhi, gabdhihiina way sooyaaceen oo dhinacooda ayey qabsadeen, qaylo iyo sawaxan baa la isla oogsaday, farxadi waa naxdin baa meeshii ka dhacday, ninkii Balayax ayaa inta hareeraha la qabsaday lagu degay, muddo nusasaace ka badan, ayaa laga fuqi waayey oo hareeraha laga lushay. Ilmada iyo dhareerka ayaa la isku daray, aragtadii Balayax, waxa ku dareertay ilmo u dhiganta, tii loo ooyey markii la waayey. Dadkii jaarka ahaa ayaa ku soo yaacay buuqii iyo sawaxankii oo is yidhi, talow maxaa dhacay, ka dibna dadkii jaarka ahaa, waxay isku soo shubeen gurigii Ruqiya, si ay u waydiiyaan waxa dhacay. Hase yeeshee, dadkii deriska ahaa wax jawaababa way waayeen, waayo dadkiiba waa isla wada maqan yihiin oo Balayax baa lagu fooraraa, mar dambe ayaa caruurtii Ruqiya dhashay yidhaahdeen abtigayo Balayax baa la helay. Dadka jaarka ahi, way garteen Balayax, inuu yahay ninkii Ruqiya ka samri wayday, ka dibna farxaddii iyo rayn rayntii bay jaarkiina la qaybsadeen ehliyaddii Balayax goor dambe ayaa dadkii waxoogaa kala yara fadhiistay oo sawaxankii damay, laakiin Ruqiya ayaa nafba laga waayey oo ku dul qalashay Balayax, ka dibna dadkii ayaa in nusaasace ku dhow, ku mashquulay sidii ay labadan qof u kala furfuri lahaayeen, inkasta oo lakala furfuray hadana gabadhii Ruqiya jirjirka u dhacday oo miyirba laga waayey. Saacad iyo badh, markii la dul joogay ayaa dhakhtar loo keenay. Dhakhtar ayaa Ruqiya ku muday dawada qofka dareenkiisa dejisa,

cabaarna Balayax laga yara qariyey, markaas ayey goor dambe soo mirowday oo yara ladnaatay.

Ninkii dhakhtarka ahaa, ayaa canaantay ninkii Balayax guriga soo tusay oo ku yidhi, “Nin dhimasho lagu tiriyey, ma aha inaad sidaa kadiska ah mar qudha guriga u soo daf siiso ee warkiisa ayaa la soo horaysiiyaa, oo iyadoo warkiisa la sii hayo ayaa guriga la keeno, waayo horaa loo yidhi, Farxaddi waa naxdin oo dad badan baa dunida farxad u dhintay ama shook qaaday”. Markii dadkii kale ka tegay, ee ay Balayax iyo dadkoodii isku soo hadheen, habeenkaas oo dhan reerkii farxad awgeed, cunto ma cunin, hurdana maledin. Markii ay asqadii farduhu 24 saac oo aan kala go’lahayn socotay, ayaa Balayax ka waramay siddii loo raafay iyo muddadii uu maqnaa wixii uu ku aadanaa, isagoo ka sheekeeyay duruufihii uu soo maray, waxaanay dadku ku dhegeysanayeen jawi xasiloon isla markaana ay si xun uga murugoodeen, jirabaada Balayax la mariyay. Iswaraysigii oo sidii u socda ayuu balayaxna dhiniciisa ka waraystay xaalada dadkoodii, wax dhintay iyo wax nool iyo qof waliba waxa uu ku sugan yahay. Waxa kale oo uu si gaar ah u waraystay labadiisii waalid ee dhalay isha ay leeyihiin, intaa markii looga jawaabay ayuu dhab ahaan u waraystay shakhsigii uu warkiisa sida Cudbi, waxaana isla markiiba loo sheegay in sanad hore aad ka uga jeel qabay, oo ay aftidiisa tahay sarkaal Ciidamada ah, laba caruur ahna ay u leedahay.

Markii warkeeda laga dhargiyay, ayaa mar qudha wahab naxdin leh iyo dhogor madoobaan ninkii Balayax isla dhalan rogay wuxuuna af-dhabaandhow

ku yidhi, “oo hadda xaggee ayay degan tahay?”, waxaana loo sheegay in ay

degen tahay guri ku yaala xaafada shacabka Hargeysa, kaasi oo loo muujiyay hadda in aanay doondooneysteedu waxba ugu fillayn isaga Balayax

oo markii uu ogaaday in Cudbi la guursaday damaca dumarba ka aguugay, taasi oo ula mid ahayd in dhamaan wixii dumar arlad joogay la wada guursaday, maalmo dhawr ah markii uu joogay magaalada ee uu baashiraada

iyo booqashooyinka dadkooda dhex dabbaalanayay in kastoo isagu uu aad u

faraxsanaa, haddana waxaa kolba qanjiidho murugo leh ku dhufanaysay xusuusta gabadhii Cudbi ee calafku kala walwaalay taasi oo uu maaro u waayay tab kale oo uu ku soo nooleeyo jacaylkii Cudbi, nin macag la noqday muddadii uu Hargeysa joogay ayuu Balayax ka codsaday inuu soo tuso barada ay Cudbi degen tahay, taasi oo ninkiina ka ogolaaday, goor fiid cawl ahayd ayay Balayax iyo ninkii kale isa soo raaceen oo soo raaceen baska taga xaafada shacabka ee Cudbi lagu qabo. Intii ay baska saarnaayeen, Balayax waxaa ku mudnaa jawi tashi badan oo aan wiilka kale

la qabin, waxaana qalbigiisa ku soo burqanay oo uu isweydiinayay su'aalo ay ka mid ahaayeen tolow markaad is aragtaan maxaydun is odhan?, isagoo

is tusayay sawiro ah, miyaydin isku dhegi doontaan?, miyaydun isku ooyi doontaan? Isagoo jeclaysanayay oo is tusayay filim ah iyadoo Cudbi marka ay aragto Balayax caashaqii hore la jibooto oo inta ay ku soo boodo xubi darteed ay ilowdo ninkii qabbay oo ay isaga soo raacday, waxaa kale oo uu is tusayay cabsida uu ka qabo askarta iyo khatarta kaga iman karta, nin sarkaal ah oo uu afadiisii damaaciyay. Gabadha Cudbi iyada qalbigeeda saamayn yarna kumuu reebin waayihii jacaylka Balayax, waxaanay xilligaas

ku jirtay nolol aad uga fog tii ay Balayax isku bartee, waayo waxaa Balayax iskugu dambaysay iyada oo inan yar oo Reer miyi ah laakiin imika waa afo qabowsatay oo uu qabo sarkaal garbo guduudan, deggena guri fiilo

ah oo kala jiidan oo rag iyo dumar badani nadiifintiisa iyo illaalintiisa ku mashquulaan, waxa kaliya ee ay ka fikirtaa Cudbi isu qurxinta ninkeeda, waxaanay dhegaysataa shagaxda dahabka tirada badan ee

curcuradeeda ku jira, sidaas darteed ma xasuusato wiil yar oo ay baadiye isku jeclaadeen, bari fog. Balayax iyo Wiilkii kale baskii ayay kaga degeen meeshii gurigu ugu dhawaa, iyagoo kalsoonidu ku yar tahay, maarran waana aanu ka madhnayn.

Balayax, markii albaabka laga furay, ayuu hallacsaday Cudbi oo daaradda taagan dabadeedna indhaha ayuu aad ula raacay, ka dibna iyada oo ay

indhiihiisu aad ugu takhlan yihiin dhinaca Cudbi ayuu yidhi, “Waxaad ku tidhaahdaa, waxa ku doonaya Balayax” marka uu Balayax sidaa leeyahay Cudbi way maqlaysaa, oo daaradda ayey ka dhegaysanaysaa, laakiin fursad

iyo xiiso badan uma hayso salaan iyo booqasho, waayo nolol kale ayey gashay. Hase yeeshee, ninkii askariga ahaa ayaa jawaabtii Balayax, dib ugu celiyey gabadhii Cudbi oo ku yidhi “Ninka ku doonaya Balayax baa la dhahaa, ayuu yidhi” Cudbi ayaa markaa tidhi “Balayaxaa-Balayax miyaanu ahayn, ninkii lawaayey ee geerida lagu tiriyey, xagee buu ka yimi, muxuu aniga ii doonayaa waar fursad uma hayo ninka waqtigan soconaya’e albaabka noo soo xidh”, ka dibna aqalkeedii ayay dib ugu noqotay. Ninkii Balayax markuu hadalkaa maqlay ayuu hoos u foorarsaday oo khajilaad la gabax yidhi, korkiisana waxa shax ka soo yidhi dhidid buurbuuran, waxaase intaa u dheeraa askarigii ayaa bahal hanjabaad ah ugu qaadqaaday, oo ku yidhi “Waaryaadha waa igaarada, guryo dad leeyahay oo

aydaan garanayn ayaad iska soo gargaraacaysaan, waar fagoof yaan la idin

xidhxidhine”. Ninkii Balayax oo awelba sas iyo cabsi ka qabey askarta ayaa naxdin la qaboobay oo sida barafka dhalaali gaadhay.

Balayax waxa la yaab ku noqotay oo uu liqiwaayey, sida ay Cudbi ula dhaqantay iyo dafiraadda ay kala hortimi. Hase yeeshee, hab dhaqanka qalafsan iyo jawaabta filan waaga ah, ee ninkii Balayax alla kaga keenay gabadhii Cudbi waxay naftiisa u noqotay xabbad kiniin ah, oo ka jebisa xummadii caashaqa ee haysay. Balayax oo ay ka guuxayso wadhidii maskaxdiisa caashaq ee haysay. Wadhidii meesha ka raacday ayaa ka soo hullelay tibadday gurigii walaashii. Balayax wuxuu gurigii walaashii tegay iyada oo ay dad ku urursan yihiin, oo buuq ka jiro dadkuna naxdin la yool-yoolsan yahay Balayax waydiiyay waxa dhacay waxaana Balayax loo

sheegay inay guriga baadheen askar koofiyad cas ah, oo isaga doonaysaa, waxyar ka horna uu guriga hortiisa ka dhaqaaqay gaadhi ciidan ahi.

Dareen naxdin leh iyo yaacyaac, ayaa xaafaddii Balayax walaashii ka abuurmay, waxaana Balayax lagu soo qariyey xaafad kale oo reerahoodu leeyihiin. Dabadeedna habeenkii ayaa laga tashaday Arrinta Balayax, waxaana la go’aansaday in magaalada laga saaro. Waxa la isla soo

qaaday

in reerkii miyiga loo diro, balse waxa laga baqay inay Ciidamada Itoobiya ee xuduudka joogaa qabtaan oo moodaan Askari Ciidamada Soomaalida wax u basaasaya, dabadeedna xagga reerka miyiga waa lagala

walaacay, magaaladiina laguma hayn karo, balse waxa aakhirii la go'aansaday in Djibouti loo diro. Subaxnimadii ayaa ninkii Balayax loo lebisay dhar dumar, ka dibna inta diric, googarad iyo foodad jiq lagu siiyey ayaa gaadhi Djibouti u socda la saaray, waxaana raacday islaan eedadii ahayd. Intii ay ku sii jireen jidka u dhexeeya Hargeysa iyo Djibouti, Balayax wuxuu ahaa gabadh dheer oo madow, oo weliba dhego la'

sidaa ayuuna kaga nabad galay askartii koontaroolada fadhiday, hadii kale judhaa dhab la siin lahaa, waayo taarkiisuna meel kasta waa yaalay, wejigiisana judhaa la garanayaa inuu askari baxsad ah yahay.

Balayax iyo eedadii goor caweysin dambe ah, ayey galeen magaalada Djibouti. Dabadeedna waxay ku degeen xaafad ay qaraabo fog yihiin, waxa ku noolaa dad badan oo hurdadu cidhiidhi bay ahayd, weliba qol walba dumarbaa jiifay oo ragga way ku hurdo xumayd. Hase yeeshee, xaafad kale

magaalada kamay garanayn sidaa awgeed xaafadoodii ayey iska cidhiidhsadeen. Balayax wuxuu la seexday laba wiil oo kale meel daarad ah, seexda habeenkii aroortiina goor hore ka toosa. Labada wiil ee kale suuqooda ayey xulaan, oo habeenkii uun bay soo hurdo tagaan, laakiin Balayax ma garanayo meel kale oo aan gurigan ahayn, sidaa awgeed kaabad

albaabka guriga ku taal ayuu maalin oo dhan fadhiyi jiray, habeenkiina daaraddiisa ayuu dib u soo jiifsadaa. Balayax, magaalada Djibouti ee uu joogaa ma ahayn meel uu iyada lafteeda beri ku yahay waayo jaandaaranka

Djibouti ayaa dadka, wixii aan sharci lahayn, waagii beryaba raafaya oo Soomaaliya dib ugu celiya, mana garanayo meel kale oo uu uga gudbo, takale hadii uu meel uun afka iska saari lahaana mahaysto wax aduun ah oo uu ku jidmaro, halkii uu u dhashayna isaga oo aan cidna dhagar ka gelin, waatii ay dantu maryo dumar u gelisay ee cir iyo dhulba loo diiday. Balayax, malahayn wax balwad ah wuxuuse aad u jeclaa shaaha.

Dhinaca dad dhexgalka iyo sheekadana wuxuu ka ahaa ammuumiyaha la sheego, haasaawe iyo sheeko dumarna Cudbi ka dib, dibnaha uma kala furin, wuxuuna maalintii waqtiga ku dhamaystaa hadh-qoodalka guriga uu daaradiisa jiifsado. Guryaha Djibouti, waxay muunadoodu ku xidhan tahay hadba shaqada qofku haysto, oo hadii uu qofku shaqo hayo rinji baa guriga lagu subkaa, hadii qofka shaqadu ka dhamaatana gurigiisa dushiisa ayaa laga gartaa inuu qofkaasi camal la'yahay. guriga ay Balayax iyo eedadii ku degeen, wuxuu ka samaysan yahay jiingad iyo loox, waana guri dul abaar ah, oo uu qofka arkaa iska garanayo inuu qofka gurigan lihi shoomeer (bilaa shaqo) yahay. Maqsinada guriga, waxa sida waadhka u jiifsada xaawalay ciiddaa ka badan. Sidaa awgeed, Balayax daaradda uu jiifsado iyo kaabadda albaabka hore iyo dib midna uma dhaafo, waxaana kabjarta ka dhigtay joog-joog xumo iyo xaalad cidhiidhi ah.

Balayax, wuxuu markii uu muddo joogay isku deyey, inuu camal doondoono, oo albaabka hore u dhaafo, balse xirfad magaalo waxba kama yaqaan, oo sooyaalka noloshiisa waxba uma dhexayn Xero gaal iyo xero askareed. Balayax mudadii uu tababarka askarinimo ku jiray, wuxuu si fiican u bartay qoraalka af-soomaaliga, sidoo kale nambarada xisaabtana wuxuu ku qori jiray far qaloocan takale boodh kasta oo wax ku qorran yihiin iyo xaashi kasta oo wax ku qorran yihiin, wuxuu isku hawli jiray inuu akhriyo. Balayax, maalintii dambe ayuu bilaabay inuu ku lug daro labadii wiil ee ay daaradda wada seexan jireen, wuxuuna subax walba suuqa uraaci jiray mid ka mid ah labadii wiil. Wiilka uu Balayax raacaa, wuxuu maryo huudhaydh ah ku iibiyaa meel u dhow waddo baabuurto marto, Balayaxna huudhaydhka ayuu wiilka la iibiyaa, maalmaha qaar ayey askarta Djibouti suuqa ku soo figaasaan, oo ay maryaha huudhaydhka ahna kala qubaan, qolyaha iibinayana waa la raafaa. Hase yeeshee, Balayax aad buu uga feejignaa in inta la qabto dib loogu masaafuriya Soomaaliya. Balayax, waxa tartiib-tartiib uga sii hadhaysay diiftii iyo darxumadii uu ka dhaxlay, askarinimadii iyo waayihii uu soo maray, aakhirkiina intuu xuub dhacsaday oo labeeni martay ayuu dib u soo noqday shacnigiisii. Dhinaca kalena marba marka ka dambeysa, waxa u sii kordhayey il magaalo, wuxuuna

in doora ka fahmay shuqulka magaalada iyo sida loogu noolaan karo.

Wuxuu

wadaba, wuu durugsaday, wuxuuna ilaalka ka hooyey iibinta dharka iyo dus-duska suuqa. Wuxuu noqday nin aamin ah oo aanu qofka bartaa

weligii

ka xiiso goynayn. Balayax, inkasta oo uu magaaladii aad u dhex galay, waxbadana kala qabsaday dhaqanka iyo nolosha magaalada, hadana marqudha

kuma daqaqamin balwadaha ay dhalinyarada qayrkiisa ahi, sida duqsi fuud (maraq) arkay ugu daateen. Balayax, aakhirii wuu ka dalacay

huudhaydhkii, wuxuuna u wareegay iibinta dharka cusub, oo inta uu soo iibiyo waxoogaa mushqaayad ah laga siin jiray, ka dibna mushqaayadihii

la siin jiray ayuu urursaday, wuxuuna aakhirii noqday nin iskii wax u

iibsada, isaga oo hadba waxoogaa dhar ah, oo ka sii dabo macaasho

mac-daarada waaweyn ka soo iibsada. Balayax, wuxuu markii dambe ku caan

noqday iibinta dharka haweenka, isaga oo dharka dumarku xidhaan la

meeraysan jiray suuqyada magaalada iyo suryooyinka xaafadaha Djibouti,

waxa inta badan waxka iibsan jiray dumarka guryaha jooga iyo gabdhaha

adeegtooyinka ah, ee xaafadaha u shaqeeya. Balayax, waxa mararka

qaarkood, ku dhici jiray inay gabdhaha xaafadaha u shaqeeyaa ka

amaahdaan duruuc ama garbo saaro, dabadeedna markuu maalmo ka dib

isyidhaahdo lacagta u doono, ayaa markuu guriga yimaado loo sheegaa

inay

shaqadii ka tagtay, balse in kasta oo lacago yaryar lagala tegi jiray,

hadana kuma khasaari jirin, ee marba qadar macaash ah ayuu ka heli jiray.

Balayax, wuxuu ahaa nin aan balwadi dhooqayn, oo waxoogaaga uu ururiyo

jeebka ayuun buu ku hayaa. Sidaa awgeed wuxuu lacag u dir-diri jiray

reerkooda oo uu duco ka shaqaysan jiray. Soomal haadka iyo hanfiga

kulaylka xeebta Djibouti, marqudha kama hadh geli jirin, sidaa darteed,

marka ay gol-casta duhurnimo ugu daran tahay ee ay cid waliba meel

hadhle ku eerato, Balayax waxa lagu arki jiray laamiyada iyo

luuq-luuqyada xaafadaha dhexdooda, isaga oo doondoonaaya cid uu wax

ka

iibsho. Balayax, qoraxdu saaxiib lama ahayn, ee sida ay dadka kale u

gubayso ayey isna naftiisa u gubaysay, waxaase dabada ka waday naftiisa oo waxay quudato ka rabto waagii cirguduutaba, Jabuutina kuma haysto eheliyad uu nafta kula eerto markay dhanaanaato. Waxa kale oo jiif iyo joogba u diiday waayaha Reerkuudu ku sugan yahay, iyada oo ay colaad iyo

abaari isku barkaday mood iyo noolba ka rifeen. Waxa jirtay gabadh Sukhra la yidhaahdo oo ku nool magaalda Djibouti, goor casar gaaban ah oo ay shamsadu joog warran le'eg dhulka ka sarayso, walwalka xeebtuna soo dhacay ayey Sukhra hurdo ka toostay. Ka dibna iyada oo gashan xamaalad khafiif ah oo ay ku seexatay, tuwaal yar-na tuurta ku sidata ayey gashay, xamaamka maydhashada. Dabadeedna is hoos taagtay qasabadii

qubayska, oo ay biyo isku shagax siisay, in yar ka dibna waxay ku soo noqotay qolkeedii, ka dibna iyada oo lebisna xamaaladii khafiifka ahayd ayey is hortaagtay muraayad weyn oo ku taal wajahadda kabadhka dharka lagu gurto oo qolkeeda gaar ah dhexyaal. Sukhra, waxa hamashka dhigay bahalo timo ah, oo tiro iyo tayabo leh, ka dibna intay dabada qabsatay saqaf ku shaqaysa dabka laydhka, ayey si farshaxanimu leh ugu furaashtay

timaheedii. Sukhra, markay humaagta muraayaddu tustay inay quruxdii wejigeedu baraarugtay, oo uu jidhkeeda ka duulay cambuskii hurdadu, ayey

hadana soo qaadatay, mindiisha ciddiyo gamuurta ah, oo ay isku dhishay. Sukhra, waxay kursi soo dhigatay daaradda hore ee gurigooda. si ay u daawato dhaqdhaqaaqa suuqa iyo dadka marmaraya wadada laamiga ah ee

gurigooda ka horeysa. Sukhra, waxa ku dhacaysa neecaw macaan, oo ah wal-wal galabeed lagu yaqaan dhul xeebeedka, waxayna indhaha la raac-raacaysaa dadka iyo baabuurta wadada isdhex qaadaya, balse dadka iyo baabuurta isku si u xiisayn mayso, ee guuxa iyo dhaqdhaqaaqa gawaadhidu, dareenkeeda waaba dhibayaan. Sidoo kalena, haweenka wadada

marmayaa aragtidoodu wax qiimo ah uguma fadhido, waxayse indhaha aad ula

raacraacaysaa wiilasha dhalinyarada ah eefaceeda ah, kuwaas oo ay isheedu si shiishka qoriga u qabanayso, isla markaana ay bidhaantooda aad u jeclaysanayso. Sukhra, waxay kolba wiil indhaha la sii raacdaba,

waxay markii dambe marqudha isha ku dhufatay bidhaanta wiil barbaar ah, oo ay cadceedda galabnimo salaanta wejiga ka hayso, waana bidhaantii sadexaad dhinaca ragga ee ay indhaheedu si sugan u milicsadaan qadarkii ay daaradda fadhiday, wuxuuna wiilkaasi garbaha ka kala riday maryo dumar, oo uu iib ahaan ula meeraysanayo. Sukhra, intay kor u kacday ayey jeedaalo xiiso leh aad indhaha ula raacday iyada oo qadar toban daqiiqo ka badan si aan limiqsi lahayn ugu dhaygagtay.

Wiilka dhalinyarada ah ee maryaha dumarka la wareegayaa ee ay gabadha

dareenkeeda soo jiitay, waa Balayax. Hase yeeshee, Sukhra ma taqaan magaciisa, waase markii saddexaad ee ay aragto. Balayax, wuxuu warwareegaba, wuxuu ku soo dhowaaday Sukhra gurigoodii, isaga oo deydeyaya cid ku tidhaahda dirica ama googaradu waa imisa. Isla markaana

Balayax, cid maryo ka iibsanaysa oo maryahaa markay aragto u yeedha mooyee, ma rumaysna, xisaabtana uguma jirto cid baa aragaaga xiisaynaysa. Sukhri iyo Balayax, waa laba qof oo aan xagga nolosha abtirsiimo wadaagin ee kala fog. Waayo Sukhra, waxay ka dhalatay qoys maalqabeen ah, oo aad u laddan, oo ay baahida nolosha kala yara dhuunteen. Sukhra, waxay ayaamo ka hor ka timi dhinaca magaalada Baariis

ee caasimadda Faransiiska, halkaas oo ay kaga jirto jaamacad sharciaga lagu barto, waxayna ku jirtaa fasax. Sukhra, midabkeedu waa maariin, laakiin barwaaqada iyo bii'ada ay ku nooshahay ayaa jidhkeeda aad u subkaya, waxaana midabkeedu u ekaaday casaan dhalaalaya oo midabka dahabka oo kale ah. Sukhra, inkasta oo ay tahay gabadh Reer magaal ah, oo aqoon iyo il magaalo wax badan ku soo dhex jiray, hadana ma aha qof, ku milantay ilbaxnimada khaayiska ah. Sidaa awgeed, way ka badbaaday isticmaalka alaabooyinka kiimikada ah, ee ay gabdhaha qaarkood quruxda ka dayaan, quruxdii Sukhra, waxay ahayd, qof garasho leh, oo caqligeedu ku fillan yahay. Sidaa darteed markii ay ka caantay, waxay diiradda saartay oo ku dhaqaaqday inay mustaqbalkeeda ka shaqayso oo ay nafteeda

iyo shakhsiyadeeda dhisto, waxa kale oo himilooyinkeeda nololeed ee ay higsanaysay ka mid ahaa inay hesho nin xalaal ah, oo ay nololsha wada qaybsadaan. Sukhra, tiro labo galbood oo hore ayey indheheedu qabteen

Balayax, waxayna ku milicsatay daymo dhumuc leh iyo dareen xiiso leh. Sidaa darteed, Sukhra, waxay aragtida Balayax, ku beertay damac jacayl iyo dareen soo jiidasho leh, isla markaana waxay labadii galbood ee horeba, u hollatay inay la hadasho, waxaase walaaciyey aqoon la'aan iyo il nugayl gabadhnimo, laakiin galabtaa oo ahayd, galab saddexaadii waxay ku talo gashay inay la hadasho oo ay xidhiidh iyo sheeko la bilwodo.

Balayax, wuxuu warwareegoba, wuxuu soo hormaray sekeddii uu ku yaalay

guriga Sukhra, ka dibna dumar horfadhiyey xaafado ay Sukhra reerkooda deris yihiin ayaa joojiyey oo eeg-eegay maryihii uu iibinayey, balse intii uu Balayax dul taagnaa dumarkii ayey Sukhri u soo baxday debedda, ka dibna markuu dumarkii ka soo dhaqaaqay ayey u yeedhay, dabadeedna wuu

ku soo leexday, wuxuuna markaa sitaa duruuc miidhan oo ay tiradoodu gaadhayso ilaa dhowr iyo toban diric, oo ah noocyada aan aad u qaaliga ahayn. Balayax, markii uu soo dul joogsaday Sukhra ayey ku tidhi “Waa imisa qiimaha maryuhu”. Ka dibna wuxuu ugu sheegay qiimo jaban.

Dabadeedna waxa ku tidhi “Waan kaa wada iibsanayaaye lacagtooda isku xisaabso”. Balayax, intuu aad u farxay ayuu xisaabtii u sheegay. Sukhra, maba xidhato duruucda noocaas ah, sidaa awgeed intay kala bixbixisay ayey markiiba u qaybisay dumarkii ay jaarka ahaayeen iyo dumar kale oo masaakiina. Sukhra, intay gurigii dib ugu noqotay ayey lacagtii uu sheegtay, u soo qaaday ka dibna intaanay lacagtii gacanta u gelin ayey ku tidhi “Walaal magacaa”, markaasuu yidhi, “Balayax baa la iyidhaahdaa”. Dabadeedna intay lacagtii u dhiibtay bay ku tidhi,

“lacagtii waa tane hoo, laakiin waxaad yeeshaa caawa todobada fiidnimo guriga iigu kaalay muraadbaan kuu leeyahaye”. Balayax, intuu yaabay buu ku yidhi “ma aniga”, markaasay tidhi “Haa”, ka dibna wuxuu ku yidhi “Waa yahay” Sukhra markale ayey ku celisay “hada ha iigoyn waan ku sugayaaye,” Balayax wuxuu isna ku celiyey “Waayahay waayahay”. Sukhra intay yara qososhay ayey tidhi “markaad guriga timaado Sukhra ayaan doonayaa dheh, magacana ha ilaawin” intaa markii la is yidhi ayuu Balayax degdeg u dhaqaaqay intuu lacagtii jeebka gashaday, Sukhra markuu

Balayax dhaqaaqay ayey sii daawatay sii jeedkiisa, ka dibna markii uu ka libdhay ayey gurigii dib ugu noqotay, iyada oo isku qancisay inay hawl

badan nafteeda u qabatay galabtaa, farxadna la kala badatay.

Balayax, waxa oogadiisa ka muuqata diif iyo darxumo badan, waayo waa nin

aan nolol wanaagsan ku noolayn oo maalin oo dhan cadceed wareegaalaysanaya, habeenkiina daarad jiifsanaya. Hase yeeshee, Sukhra waxaasi uma muuqdaan ee waxa kaliya oo u muuqda suuradiisa yaabka leh

iyo rabitaankeeda nafsaaniga ah, waxaaba laga yaabaa dookhu waa cajiibe,

inay diifta iyo suuradda nololeed ee ka muuqata ku raacday. Naftu waxay jamato, loogama taag helee, Sukhra si aan qiyaas lahayn bay nafteeda ugu qancisay Balayax, waxayse hoosta iswaydiinaysay, “Talow xaas maleeyahay”

balse, xataa hadii uu yeesho xaas kale, dareenkeedu kama xiiso goynayo oo waxay nafteeda ku qancisay inay macal xaaskiisa ku qaadato. Sukhra, aabaheed wuxuu ka werweri jiray inay gabadhiisu dhaqanka gaalada ku milanto, oo ay maalinta dambe nin gaal ah, ula timaado wuuna nebcaa dhaqanka gaalada. Sukhra, aabaheed wuxuu wadnaha farta kaga hayn jiray

in la soo sheego gabadhiisa oo Baariis nin faransiis ah jaas kula cayaaraysa, weligiina ma filayn inay jeclaan doonto, wiil yar oo wadooyinka magaalada iyo luuq-luuqyada xaafadaha dhexdooda dayac iyo qoraxi ku dilootay. Hase yeeshee, Sukhra iyo aabaheed way kala war la'aayeen waayo Sukhra ma jeclayn ragga dabaqade sare ku nool iyo wiilasha reeraha laddan ka dhashay dhaqanka gaaladana way nebcaayd. Markii ay xiligii ballanta gaadhay ayuu Balayax gurigii Sukhra soo qabtay, isaga oo aanay maskaxdiisu waxyarna ka mallaynayn muraadka ay gabadhani ka leedahay. Balayax, ma soo bedellan ee waa suuradii uu galabtaa kaga tegay, Sukhra wuxuuna xidhan yahay shaadh iyo surwaal uu huudhaydhka kala soo baxay oo meel walba ka cadaaday siduu qoraxda ula

wareegayey iyo kabo buudh ah oo afka hore ka daloola oo markuu talaabsado ciidda cantuugaya. Jidhkiisa waxa ka soo uraya siifadii ka soo raacday bacadkii uu maanta oo dhan meeraysanayey iyo dhididkii ay golcastu jidhkiisa ka tuujisay. Balayax, markuu gurigii Sukhra tegay ee uu albaabka garaacay, waxa ka furtay gabadh oo ku tidhi, “maxaad

doonaysaa”, markaasuu ku yidhi “Waxaan doonayaa Sukhra” dabadeedna gabadhii intay huruuftay ayey ku tidhi, “Waryaa huudhaydhle yaa ku baray Sukhra, waar soco”. Balse intaanu Balayax dhaqaaqin ayaa Sukhra oo dhegtu taagnayd hadalkii maqashay, ka dibna intay haw soo tidhi ayey gabadhii Balayax la hadashay indhaha kaga dhacday, oo weliba ku sigatay inay gacanta saarto, markaasay Balayax ku tidhi, “Soo soco walaal”.

Balayax baa gurigii hore u galay. Daaradda gurigu waa mar-mar, balse Balayax wuxuu daaradii sii dhexmaray isaga oo sita kabihi calfaha ahaa ee afka ka daloolay, markaasuu ciid kuus-kuusan kaga tagay meeshuu cag dhigoba, waxaase basrisay Sukhra, oo meeshuu raad dhigoba wixii ciid kaga hadha cagaheeda ku kala riixda. Sukhra, waxay Balayax fadhiisay qolkeedii oo si fiican u goglan ka dibna kursi fadhi ah oo buush kasamaysan ayey tidhi ku fadhiiso, iyana mid kale oo ka soo horjeeda ayey soo fadhiisatay, markaasay cod naxariis leh ku tidhi, “Walaal maxaad cabaysaa?” Balayax oo si didmo ugu jirto, dhegahana taagtaagaya ayaa yidhi “iga daa waxba cabimaayo oo haraad ima hayee”. Sukhra intaa kuma dayn ee intay soo agdhigtay noocyo sharaab ah, sida Pepsi colla, Fanto iyo Mirinda ayey tidhi “Walaal kala dooro” Balayax, intuu cabaar aamusay ayuu ku yidhi “Naa aniga igadaa bahalahan oo shaah mala hayaa”.

Sukhri intay qososhay bay tidhi “Haa walaal, sidee baan shaah loo hayn”, markaasuu yidhi “Aniga fijaan qaxwe ah ii dhiib” ka dibna intay falaas shaah ah soo agdhigtay ayey bakeeri ugu shubtay shaahii. Dabadeedna markii ay shaahii siisay ayey ku tidhi, “Balayax waxaan ku waydiiyey, qaadka macuntaa, sigaarkase macabtaa”, markaa ayuu ku yidhi “Maya midna

iskuma dayo, wax balwed ahna ma lihi”, waxay hadana weydiisay, “Xaas ma

leedahay”, maya ayuu yidhi, waxay kale oo ku tidhi “Adigu ma Reer Djibouti baad tahay”, wuxuu ku yidhi “Maya ee Hargeysa ayaan ka imi” hadana waxay ku tidhi “maalin kasta ma dharkaad la wareegtaa”. Haa ayuu yidhi, waxa kale oo ay waydiisay “Balayax adigu maxaad jeclaan lahayd inaad mustaqbalka noqoto”, wuxuuna ugu jawaabay “Waxaan doonayaa inaan

bacadle weyn suuqa ka furto oo aan dhar badan iyo diricyo badan iibiyo”. Sukhra, waxay hadana ku tidhi “Ma intaas oo qudha, ayaad doonaysaa,

miyaanad wax kale u baahnayn”.

Balayax, wuxuu yidhi “Uma baahni”, Sukhra oo xiisaynaysa jawaabaha Balayax ayaa tidhi “Balayax, gabadh ma la sheekaysataa” maya ayuu yidhi.

Waxay hadana ku tidhi “Habeenkii miyaanad cidna raacin oo aydaan suuqa u

wada bixin”, wuxuu yidhi “Walaal habeenkii debedba uma soo baxo waayo sharci ma lihi oo booliska ayaan ka baqaa, sidaa awgeed xaafad baan la seexdaayoo, fiid cawlka ayaan hoydaa, salaadiina waan kacaa oo duruucdayda ayaan la meeraystaa, markaa waxa aad sheegaysaa hawlahayga

maaha”. Sukhra, madaxa ayey ruxday, waayo wax badan ayey ka fahamtay

dhaqankiisa iyo xaaladiisa nololeed, si ay hadaba didmada uga saarto ayey ku tidhi “Balayax tiifiiga aan inoo shidee filimada nooc ee baad jeceshahay” wuxuu ugu jawaabay “maba daawado”, markaasay, hadana ku tidhi “Haddaa aan shiriigga (Raadyowga) inoo shidee heesahee ayaad dhegaysataa” wuxuu ugu jawaabay “Heesahana ma dhegaysto”.

Markaasay ku

tidhi “Miyaanad hees-ba aqoonin” markaasuu yidhi “Hal hees baan aqaan” waxay ku tidhi “Waa tee, bal ku luuqee” markaasuu isaga oo ku luuqaynaya wuxuu yidhi, “Tollaay, Reer Hargaysow, dhankaad iga jirtaan baa dhaxantu iga haysaa”. Sukhra, weligeed ma maqal heestaa iyo fanaan qaadaya toona,

dabadeedna intay yara qiirrootay, ayey tidhi, “Walaal yaa qaada” wuxuu yidhi “Waxa qaada Maxamed Mooge”. Sukhra, waxay markaa ku tidhi “Walaal

ninkaa cajaladiisa, magaalada ma laga helayaa”. Dabadeedna, wuxuu yidhi “Haa”. Balayax, sheekadiisa iyo dareenkiisaba waxa laga akhrisanayaa, inay wax xaganayaan, oo geeliisa cirka lagu maalayo. Sidaa awgeed, Sukhra waxay fahantay in ninkan ay dhibaato dalkiisii ka keentay, oo uu halgan ugu jiro ama aad uga fekerayo dalkiisii oo laga haysto. Sukhra, aad bay maqsuud uga tahay joogista uu Balayax la joogo, ka dibna kamarad

yar oo ay haysatay ayey ku sawirtay, waayna marba marka ka dambaysa ku

sii istareexaysaa sheekada iyo la cawaynta Balayax, isla markaana Sukhra, waxa ku beermay oo jacaylkii u dheeraaday, qaddiyadii Balayax ee halganka. Iyada oo ay Sukhra, sheekadu meel fiican u marayso, oo uu dareenkeedu naruuro iyo nasteexo quudanayo, ayuu Balayax yidhi “Walaal, waxa la gaadhay xiligii aan tegi jiray guriga aan seexo, waayo goor hore ayaan hoydaa, oo waxaan ka baqayaa jaandaarranka, markaa waan hoyanayaa”.

Sukhra, ma jeclayn inuu Balayax ka tago, ka dibna waxay ku tidhi “Walaal cabaar iska joog, aniga ayaa hadhow booliska ku dhaafinayee, hadii kalena iskaba joog, gurigayaganba waad seexan kartaaye”. Balayax, wuxuu

ugu jawaabay “Naa maxaa tidhi, sidee baan u seexdaa guri dad leeyahay”. Sukhra, intay qososhay ayey tidhi “Gurigu waa gurigayagii, aniguna xoriyad baan u haystaa, hadii aad doontona waad seexan kartaa”. Balayax, Arrinta seexashada guriga waa ka gotaaleeyey, sukhkana markay aragtay inay ku adag tahay, ayey ku tidhi “Hadii aanad ila joogayn, oo aad caawa iga tageyso, markaa habeen dambe ii kaalay, oo toddobada fiidnimo yaan ku waayin. Waayo muraad weyn baan ku leeyahay” ka dibna wuxuu yidhi “qabuul”, markaas ayuu sidii bisad xabsi laga sii daayey degdeg albaabka uga booday. Balayax, markuu daaraddiisii uu jiifsan jiray tegay ayuu isweydiiyey, tolow muraadka ay gabadhani kaa leedahay halkee buu daarran

yahay”, qaabka ay doonaysaa, waa caynkee, malaa gabadhan caynkaa u eg,

ee reerka kibray ka dhalatay, ninkaagan cagaha cad, wax kale ku falimaysee, ma waxay doonaysaa inaad u shaqayso”. Balayax, habeenkii oo

dhan hurdo ma leddin, maskaxdiisuna aad bay u shaqaysay, waxa ku abuurmay feker cusub iyo dareen yididiilo leh, waxa u muuqday odorso jacayl oo aanu beryahaa oo dhan. Sidoo kale, gabadhii Sukhra habeenkaa cunto iyo caways kale toona uma baahan, waxayna la labban legdootay farxad iyo rayn-rayn, iyado oo isku qaacisay inay libbin weyn gaadhay, ka dibna markii ay nefteeda la showrtay, waxay talo ku soo ururisay inaanu Balayax, kulankan-kulanka xiga dib u noqon, ee ay umuraad sheegato, ka dibna ay aabeheed ku wargeliso inay doonayso inay ninkan is

guursadaan. Sukhra, aabeheed, aad buu u jeclaa, dadna iyada iyo wiil qudha ayuu leeyahay isla markaana Sukhra aabeheed aad buu ugu tabci jiray, isaga oo doonaya inay mustaqbal wanaagsan iyo sharaf ku noolaato. Sidaa awgeed, wuu la jeclaa guur, mase jeclayn inuu inantiisa u soo golefadhiisto nin duruuc wadada ku iibiyaa . Sukhra Aabaheed ma jeclayn inuu guur u soo doonto nin aan dabaqadda sare ka dhallan, oo danyar ah. Hase yeeshee, tashigiisu wuxuu ahaa inaanu ka hor iman rabitaankeeda oo

aanu mooral jebin. Balayax, habeenkaa maalinnimadiisii wuxuu hawlihiisii ganacsi iyo dhar iibintiisii ku dhamaystay jawi farxadeed iyo shax-shax. Isla markaana waxbuu ka bedelay dabeecadiisii hore, waayo halkii uu fiidka guriga ka tegi jiray, maalintaa, wuxuu tegay goor hore oo casar gaabkii ah, ka dibna intuu maydh-maydhay ayuu isgiigiiyey oo qaab cusub oo kiisii hore ka duwan u leebistay, maryihiina iska bedelay.

Dumarkii guriga uu seexdo joogay ee dabeecadiisa yaqaanay ayaa yaabay,

oo yidhi “naa yaadha ma sidan buu u qurux badnaa, tolow maxaa ku soo kordhay, kolley waxbuu damacsan yahaye, muxuu damacsan yahay”.

Balayax,

oo aad u ilaalinay xiligii ballanta ayaa markii ay toddobadii dhowr daqiiqo ka hadhsanayd, isu cayntariyey dhinicii gurigii Sukhra ee uu ballanta ku lahaa, isaga oo aad u degdegaya. Balayax, intii uu jidka ku sii jiray waxa uu ku sii laafyoonaayey jawi xarago leh, wuuna isdaawanayey, isaga oo kolba dhinac iska eegaya, oo saxarka iska dhowraya ayuu gurigii ku tibbadday. Hase yeeshee, markuu suryadii guriga looga leexan jiray ku baydhay, oo uu albaabkii gurigu u muuqday, ayaa marqudha inta dhabarka lagaga yimid tudh la siiyey, saa waa ciidankii jaandaarranka ee uu weligii ka baqan jiray. Dabadeedna, waxay degdeg u waydiiyeen sharcigiisii, balse nasiib daro, ilayn sharci hayste maahee, markii ay ka waayeen ayey ku riteen gaadhi shabaqle ah, oo meel halkeer ah u taagnaa, ka dibna waxay ku tuureen jeel Djibouti ku yaal oo la yidhaahdo Gabood. Gabadhii Sukhra, oo habeenkaa aad ugu sii diyaar garowday ayaa gediga habeenkii albaabka guriga debediisa lignayd, oo qofkii dariiqa soo maraba, u malaynaysay Balayax. Ka dibna waxay taagnaataba, goor dambe ayaa iyada oo madluun ah, Aabaheed u yeedhay,

dabadeedna markuu ka yaabay dhogor madoobaanteeda iyo in qabar ku yuururo, ayuu waydiiyey waxa ku soo kordhay, balse waxay isku dayday inay wax ka qariso oo majare habaabiso, laakiin way qancin kari wayday, wuxuuna iska gartay inay debedda cid ku sugaysay, wuxuuna ku yidhi “Aabe, cid baad banaanka ku sugaysay ee iskamaad taagnayne yaad ku sugaysay, waxba ha iga qarine”.

Dabadeedna Sukhra, markay aragtay odaygu inuu dareenkeeda si fiican u fahmay ayey isaga badheedhay, waxayna ku tidhi “Aabe wiil Balayax la yidhaahdo oo aanu ballan sanayn ayaan sugayey”, wuxuu yidhi “Aabo Balayaxu, muxuu ahaa”, waxay tidhi “Aabe, waxa weeye wiil dhalinyaro ah oo aanu sheekaysano, jacaylna naga dhexeeyo”, wuxuu yidhi “Aabbe waa heli doontaaye iska seexo”. Hase yeeshee, Sukhra habeenkaa hurdo uma dhadhamin, waxayna u labo boglaysay, sidii qof dhiilo ku soo korodhay, waxa hadheeyey feker iyo wahan, ma garanayso, meel ay u raadiso, oo aan

ahayn inay wadada ka eeg-eegto, waxayna isku ciil kaambiday fursaddii habeen hore oo ay isku canaanatay inaanay ka faa’iidaysan, oo uu si hawl yar kaga dhamaaday kulankaasi, balse Sukhra, ma oga inuu ninkii Balayax gacan cadow galay, oo uu god madow ku jiro. Ninkii Balayax, markuu habeenkii xidhnaa ee subixii albaabka laga furay xiligii quraacda, ayuu go’aan ku gaadhay inuu baxsado, ka dibna ilayn, waa nin tababar kamaandoos soo qaataye, intuu afar nin oo jeelka ilaalinayey, looto ku gagabiyey ayuu gidaar ka booday oo taw yidhi. Hase yeeshee askar baa ka

dabo yaacday oo markuu hal cabbaar ah, sii ordayey ayaa gidaar dheer oo dhismayaal ahi soo oodday, ka dibna inta la qabtay ayaa si xun loo jidh dilay. Dabadeedna isaga (Balayax) iyo shan nin oo kale ayaa inta goor habeen madow ah gaadhi lagu qaaday, la geeyey tuulada lawyacaddo oo ku

taal xadka, waxaana gacanta loo geliyey askartii Siyaad Barre ee uu ka soo baxsaday. Ciidankii Djibouti ee Balayax iyo raggii la socday xadka keenay, waxay ciidankii Siyaad Barre ee ay raggaa u gacan geliyeen u dhiibeen waraaq galaysan, oo laga soo qoray xafiiska nabadgelyada iyo wadashaqaynta Soomaaliya iyo Djibouti. warqaddaa waxa ku qoran inuu ninka Balayax la yidhaahdaa ka tirsan yahay ururka SNM, isla markaana uu

tababar halis ah ku soo qaatay meesha la yidhaahdo (Baabuli) oo ku taal Ethiopia, waayo askarta Djibouti waxay ka yaabeen tababarkiisa belada ah, saraakiishii ciidamadii Siyaad Barre ee lawga joogay, markii ay warqaddii akhriyeen ayey Balayax ka tiinad ku jebiyeen, waxayna askartii ka tiinadda ku jebinaysay, ku boobeen haraati iyo qori dabadii, iyaga oo ku dhawaaqaya “Qurmish-Qurmish dhashay”. Sarkaalkii haystay ciidankii Siyaad Barre ee lawga fadhiyey ayaa markiiba taar ku soo cayntaariyey Hargeysa, wuxuuna si dhiillo leh, ugu sheegay inuu hayo nin qurmish ah. Waxa sarkaalkii degdeg loogu amray inuu Hargeysa u soo dhaadhiciyo. Dabadeedna ninkii Balayax, oo ka tiinadaysan ayaa inta ciidamo tikniko wata lagu soo daray, Hargeysa la keenay, waxaana lagu xidhay xeradii Hangashta ee Hargeysa. Gabadhii Sukhra, laga soo bilaabo tan iyo habeenkii ay Balayax ka hungowday waxay u ahayd yooyaal iyo seexanwaa, gabalkii dhacaana wuxuu u ahaa galab-baas. Jacaylkii cusbaa ayaa ku siraatay, oo jiif iyo joogba u diiday, qalbiga ayaa gubanaya oo marqudha farxad laguma arag, waxa sida laytarkhadarka ku noqday aragii Balayax, waxay noqotay sidii qof aad u harraadan oo inta biyo xareed ah lagu yidhi cab, balse markuu is yidhi afka saar laga dhufatay, meel loola kacayna garan waayey.

*S*ukhra, tegistii uu Balayax ka tegay iyo ku soo noqonwaagiisii, wuxuu ku noqday afkala qaad, waxay xusuusatay googaalaysigii caruurta ee ahaa “Meeshaa mar oo muuqaaga la waa” Waxay ku dul-dhaygagtay taswiir ay habeenkii ka qadaay. Waxa hadheeyey boholyow iyo qulub, dadka ka yacsumay sidaa darteed, ehliyadeeda iyo dadkii deriskuba marii ay u caddaatay inaanay Sukhra dawo kale lahayn, ninkii Balayax oo ay hesho mooyaane ayey talo aduun noqotay in ninkii Balayax la baadidoono oo Djibouti laga dhex baadho. Sukhra iyo aabaheed ayaa is-raacay ka dibna iyaga oo gaadhi wata ayey ka yaboohiyeen suuqyada dharka huudhaydhka ah,

lagu iibiyo. Sukhra, marba qof ayey sawirkii Balayax tustaa oo ku tidhaahdaa ninkaa ma garanaysaan, dhowr qof ayaa wejigiisa gartay, balse garan waayey meel uu u baadi yahay, ninkii ugu dhowaa ayaa sheegay in la

raafay, lagana yaabo inuu jeelasha Djibouti ku jiro. Jeelashii ayey Sukhra iyo aabaheed ka soo baadheen, balse way ka soo hadh galeen,

waana

la waayey meel uu jaan iyo cidhib dhigay. Inkasta oo Balayax, laga soo walagdhigay hadana Sukhra, uma ahaan, oo samir iyo quus daayoo, markii ay ogaatay in la raafay isaga oo ku soo socda ayaa xanuunkii jacaylku ku soo labo kacleeyey oo ay qalbiga ka sii ruxantay. Gabadhii Sukhra, ee caafimaadka daarradda ku laydh san jirtay, firfircoonideedana laga yaabi jiray, waxay gaadhay heer ay jiifka iska rogi waydo oo ay sariirta dultaalo, waqtiga inta badan, ay sawirkii Balayax ka dul ooydo, waxaase Sukhra, murugada iyo dhibaataada soo food saartay laqaybsaday waalidkeed

oo aad u jeclaa, inuu saxar gaadhona aan ogolaan jirin. Sukhra, waxay yididiilo iyo nefis ka dhigan jirtay in loogu sheekeeyo Balayax, waa lahelayaa, balse markii muddo laga soo wareegay sidiina ay dhaami wayday, ayaa fasaxii jaamacadduna ku dhamaaday, dabadeedna waxa lagu qanciyeey inay Jaamacaddii qabato maadaama uu fasaxii ka dhamaaday, iyada oo dhinaca kalena loo ballan qaaday in Balayax la sii baadidoonidoono.

Ka dibna waxay qabatay Jaamacaddii. Hase yeeshee, markii ay Baariis tagtay, ayaa intii aanay Jaamacaddii iska xaadirin waxay ku horaysay dhakhtarkeedii ay la xidhiidhi jirtay marka ay xanuun dareento.

Dhakhtarkii, wuxuu Sukhra, waydiiyey xanuunka ay ka cabanayso iyo sida loo hayo, ka dibna waxay ku jawaabtay “Hurdo la’aan, feker badan, daal badan iyo culays nafsaaniya”. Dhakhtarkii ayaa hadana waydiiyey “Sukhra, ma jiraa wax kaa maqan oo aad ku werwertaa, takale waa maxay waxa ugu badan ee aad ka fekertaa?”. Sukhra, waxay ku jawaabtay “Haa waa jiraa, wax iga maqani, waxa ugu badan ee aan ka fekeraana waxa weeye wiil la yidhaahdo Balayax oo aan waayey”. Dhakhtarkii ayaa isaga oo maskaxdeeda

dejinaya u celiyey “mar hadii ay sidaa tahay, waxba ma qabtid, oo waad fiican tahay, balse waxaad ogaataa inaanu fekerka badani naftaada waxba tarayn, wax uu yeelo mooyee, sidaa darteed, waxa haboon inaad la dagaalanto mashquulka badan”. Dhakhtarkii, Sukhra uma qorin wax kiniin ah, balse wuxuu dawo uga dhigay waxoogaa talo ah, isaga oo yidhi “Caafimaadkaagu, wuxuu ku xidhan yahay adiga oo dadka la sheekaysta,

oo

la qosla, filimada daawashadoodana badiya, waxa kale oo aan kugula talinayaa inaad nin kale guursato ama la saaxiibto xataa hadii aanad jeclayn, maadaama ninkii aad jeclayd aad Jabuutina ka soo wayday, Baariisna aanu joogin, iyada oo loo baahan yahay inaad xusuustiisa ka meermeerto, si aan caafimaadkaaga waxyeelo ugu gaysan, waxbarashadaadana

aad u dhamaysan karto. Markaa sidaa yeel, bil kastana hal mar iikaalay”. Ayuu dhakhtarku kula taliyay. Sukhra, jaamacadeedii ayey iska xaadirisay, talooyinkii dhakhtarna way isku qancisay, marka laga reebo qoddobka ah, nin kale guurso. Sukhra, talooyinkii dhakhtarka markii ay ku dhaqantay, waxoogaa isbedel ah ayey dareentay waxaana u suuro gashay

inay waxbarashadeedii sii wadato, laakiin jacaylkii iyo rabitaankii Balayax, nafteeda ku beeray marna kama bixin xusuusteeda. Balayax, markii lagu riday god ku yaal xerada hangashta ee uu hal habeen ku jiray ayaa naalintii dambe wax la waydiiyey, waxaana laga waraystay SNM-ta iyo

xiligii uu ku biiray ka dibna markii su’aashaa la waydiiyey wuxuu ku jawaabay “Anigu weligay maan arag meel ay SNM joogto, kamana mid noqon”.

Hadana waxa la waydiiyey “maxaad ka shaqayn jirtay”, dabadeedna wuxuu yidhi “Djibouti ayaan duruucda iyo dharka huudhaydhka ah, ku iibin jiray”. Hase yeeshee Balayax, wax kasta oo uu ku andacooday lagama aqbalin, waxaana markhaati looga dhigay warqaddii been abuurka ahayd ee

Djibouti laga soo raaciyey. Markii loo soo qaadayey xagga Soomaaliya Balayax, waxa meel kula xidhnaa dad kale, oo aan xataa waraaq been abuur

ahna lagu soo lifaaqin balse u qoollan qudhmis baad tihiin, markhaatina loo dhigay qudhmis buu u eg yahay yahay. Xiligaasi, wuxuu ahaa xili ay SNM-tu cudud milateri iyo mid siyaasadeedba ugu badheedhay taliskii Siyaad Barre, oo ay sheekadu hadal hayn iyo dareen dhaaftay, hadhcadna la isu badheedhay. Dawladii Siyaad Barre, xaalkeedu wuxuu noqday, “Fule wax ka qoryo badan” iyo “Fule meel aan godobtiisu jirin ayuu nabar ku babsiyaa”. Sidaa awgeed waxay samaysay hayado iyo kooxo gaar ah, oo leh

magacyo kala duduwan balse hal shaqo oo isku mid ah dhamaantood haya.

Hayadahaasi waxay fasax iyo awood aan xad lahayn u haysteen inay dadka

rayidka ah sida ay doonaan ugu takrifalaan, oo ay marba inta ay doonaan soo xidh-xidhi karaan kuna eedeeyaan qudh-misbaad tihiin, markhaati iyo caddayna uga dhigaan Reer hebel iyo qudhmis bay gacan siinayeen. intaa ka dibna waxay fasax iyo amar u u haysteen inay dadkaa qoorta u dheereeyaan, hantidoodana la wareegaan.

Muraajaco ahaan ayaa intan loogu soo celiyey Balayax, wuxuu markiiba dhufsaday qori kamid ah, qoryihii laga qabsaday askartii jeelka, ka dibna wuxuu xagga hore ka raacay ciidamadii jabhadda SNM. Balayax, oo qaba ciil iyo cadho ku gaamuray, ayaa qorigii badhada u safaystay, ka dibna, isaga oo ka faa'iidayshanaya tababarkii kamaandawsnimo ayuu dagaalkii isku labo rogay. Wuxuu noqday sooma jeeste aan la looddin karin oo aagga uu galaa ay gallan tahey, wuxuuna ka qaybgalay hawlgalo dhuumaalaysi ah iyo dagaalo qadhaadh oo ka foolka fool ah. Balayax, goobo badan ayuu ka dagaal galay, wuxuuse aakhirikii ka weerar galay gudaha maamulka Dowladda oo ay ifisadu ka heesayso, madaafiicduna ka reemayso. Wuxuu ka mid noqday wiilasha gacanta barakaysan ee lagu aamino

qoryahay silsiladda jiita ee badh-daloolka loo yaqaan. Muddadii uu dagaalku socday, Balayax dib oo dambe uma waraysan cidna ma waydiin meel

reerkoodu yaalo, isla markaana muddadii ay socdeen dagaaladii SNM, Balayax, wuxuu goor walba joogay afjinacleysda ugu xun ee dagaalka. Markii ay SNM-tu, dib uga baxday gudogalkii magaalooyinka, wuxuu Balayax, ka mid ahaa ciidamo SNM ah, oo ku sugnaa waqooyiga Hargeysa.

Waqtiyada aan dagaalku socon Balayax wuxuu dhegaysan jiray qasiidooyin

iyo heeso ay jabhaddu ku digriyi jirtay sida “Dadyahow hubka qaata, holciyaay cadowgiina, wixii aad rabtaanba Ilaah baad ka heshaane, Allaahu maalg, wa saalim, calaa xabiibi Muxamed caleylihi salaam”.

*B*alayax, markuu qasiidooyinkaa maqlo, ayuu dareenkiisu sii kici jiray,

waxaana geli jiray dhiiranaan iyo shucuur geesinimo oo hor leh. Sukhra, iyadu marka ay dhegaysato heesaha Maxamed Mooge, gaar ahaan heesta ay

midhaheeda ka mid yihiin “Tolaay, Reer Hargeysow, dhankaad iga xigtaan baa dhaxantu iga haysaa”, ayay kalgacal aan qiyaas lahayn la dheeliman jirtay, waayo waxay uun xusuusan jirtay habeenkii uu Balayax kursigii maqsinkeeda yaalay ku fadhiyey ee uu heestan sida quruxda badan ugu luuqaynayey.

Gabadhii Sukhra, waxay maalintii dambe shaqo ka heshay hayad Faransiis ah oo Djibouti deganayd, xafiisna ku lahayd magaalada Diridhabe ee dalka Ethiopia, waxayna hayaddaasi ahayd, Hayad samofal, oo ka shaqaysa caawimada dadkii qaxootiga ahaa ee ka barokacay magaalooyinka waaweyn

iyo tuulooyinka gudaha ku jira.

Sukhra, waxay shaqadeedu u badnayd socdaalo dhulka ah, oo ay hayaddaasi

hawlo kaga qaban jirtay meelo ka mid ah degaamada gobolka Awdal iyo nawaaxiga Hargeysa.

Markii ay ciidamadii SNM dib uga baxeen magaalooyinka, gaar ahaan ciidamadii Hargeysa ka baxay ee uu Balayax ka tirsanaa, waxay fadhiisimo ka samaysteen degaamada ku gadaaman naawaxiga Hargeysa, waxaana jabhadda

caado u ahayd inay jidgooyin ka galaan wadooyinka hareeraha ka soo gala Hargeysa. Maalin-maalmaha ka mid ah, ayey Hayaddii Faransiiska ahayd ee

ay Sukhra u shaqayn jirtay hawl sahamin ah ku samaysey goobo ku yaal waqooyiga Hargeysa, oo la sheegay inay dad qaxooti ahi ku suganyihiin.

Sukhra iyo saddex hawl wadeen oo caddaan ah, oo uu weheliyo nin darawal

ah oo Soomaali ah, ayaa iyaga oo wata baabuur Landcruiser ah, socod ku soo maray meel ka mid ah waqooyiga Hargeysa. Ka dibna hurrin ka tirsan ciidamadii SNM, oo meel waddo ah jidgooyo kaga jira ayaa qabtay baabuurkii Hayadda Faransiiska ah, oo saaranyihiin shan qof oo ay Sukhra ka mid tahay. Jabhaddii intay baabuurkii la hadheen ayey dadkii geeyeen xero jabhaddu lahayd oo ku taal kayn dhexdeed.

Qoladii gaalada ahayd aad bay u naxsanaayeen, laakiin Sukhri, iyadu caadi bay iska ahayd, oo dareen cabsiyeedba isma gelin. Waxayna mashquul

ku ahayd doondoodnista Balayax, oo aad moodayso in meelahan loogu sheegay, waxay aad ugu fiirsanaysay wejiyada inamada jabhadda ah, waxaana marba ku soo baxayey qaar suuradoodu u egtahay Balayax, oo ay

hoostaa ka leedahay “Alla kaasi Balayax u ekaa”.

Qoladii Hayadda, markii la keenay xeradii jabhadda, waxa maxaabiis ahaan

loo fadhiisiyey geed hoostii, waxaana loo sameeyey rag waardiyeeya. Balayax, wuxuu ka mid yahay qolada jabhadda ah ee markaa joogta xerada

qolada Hayadda la keenay, kadibna wuxuu qoladii jabhadda ahayd ee qolada

Hayadda ah, soo qabatay ku canaantay soo qabashada ay soo qabteen hawladeenada Hayadda.

Balayax baa yidhi “oo waayo” markaasaa lagu yidhi “waxay u qaateen in la dilay, haddii aad Sukhra raaci waydo oo aad caddayn waydo inay jacayl u xanibantahay, waxa caalamka oo dhan laga sheegayaa in ururka SNM ay dileen gabadh Hayad u shaqayn jirtay, taasina waxay dheg xumo ku noqonaysaa sumcadda ururka, sidaa darteed, waa inaad Sukhra soo raacdaa,

oo aad ururka dhegxumada kala dagaalantaa”.

Wax la wadoba Bayalax aakhirii wuu ogolaaday inuu Sukhra raaco, ka dibna goor gabal dhac ah ayaa xeradii laga soo baqoolay, iyada oo habeenimadii guurogal lagu dhaafay Arladii khatarta ahayd, ee ay labada col iska ugaadsan jireen. Ka dibna subaxnimadii ayey tageen

Harta-Sheekha, iyaga oo nabad qaba, Balayax iyo Sukhra iyo baabuurkii sidayba. Waxaana Sukhra loo geeyey qoladii gaalada ahayd, waxayna qoladii jabhadda ahayd, u sheegeen gaaladii in Sukhra loo soo kexeeyey wiilkii ay jeclayd oo uu kan yahay “inta Balayax gaaladii la horgeeyey”.

Qoladii gaalada ahayd intay aad u farxeen ayey u mahad celiyeen saraakiishii SNM iyo jabhaddii oo dhan.

Hase yeeshee, waxa dhacday inuu Balayax yidhi “Sukhra, mar haddii aan gaaladii kuu keenay, adiga oo nabadqaba, anigu waxaan ku noqonayaa farrantii ee hawshaadii, adna iska wado oo marka ay dunidu si uun noqoto ha inoo ahaato”.

Sukhra, markii ay hadalkaa maqashay ayey naxdin awgeed muraayaddu jabtay, oo ay muraara dilaacday. Gabadh caddaan ah, oo madax ka ahayd xafiiska Hayadda ay Sukhri la shaqasyo ayaa Balayax, aad uga codsatay inuu doonista Sukhra tixgeliyo, oo uu nafteeda badbaadiyo. Balayaxna wuu aqbalay. Markii la yiqiinsaday halka uu Sukhra xaal ka taagan yahay ayey arini noqotay, in laga shaqeeyo sidii la isugu dhisi lahaa ee guurkooda loo bud-dhigi lahaa. Sidaa awgeed isla ayaamihiiba, Balayax iyo Sukhra waxa meherkoodu ka dhacay magaalada Dirirdhabe ee dalka Ethiopia, waxaana meherkooda loo sameeyey xaflad aanay ka soo qayb gelin dad aad u

badani oo ka dhacday Huteel. Maalmo toddobaad ka yar, ayaa hadana aqalkoodu ka dhacay isla magaaladii Dirirdhabe. Balayax iyo Sukhra, waxa farxad iyo gaar ugu fillaa inay dhinaca isa saaraan labadoodu, oo uu midba-midka kale daawado, kuna raaxaysto sheekadiisa, isla markaana uu midba midka kale aragiisa ku ildoogsado. Habeenkii Aqal-galkooda, waxay u ahayd habeen farxadeed, iyaga ayaa is cajebiyey, iyaga ayaa isdaawanayey, iyaga ayaa isu udgoonaa, iyaga ayaa isu bidhaamayey.

Sidaa

awgeed macno uma samaynayn, fursad ay ku indho-indheeyaana umay hayn

dhal-dhalaalka iyo alaabooyinka lagu sharaxay guriga ay ku aqal-galeen. Labadan qof, waxa loo gaafay oo uu Arooskoodu ka dhacay guri markii horeba u kiraysnaa Sukhra, oo gudihiisu fakaag badan lahaa, si quruxsanna loo qalabeeyey.

Sukhri, si ay fursad wanaagsan ugu hesho baanashada jacaylkeeda, waxay

Hayaddii ay u shaqayn jirtay ka qaadatay fasax Afar bilood ah. Balayax iyo Sukhra, afartaa bilood mar qudha indhahooda iyo aragoodu daqiiqad ma

kala libdhin, jacaylkoodana bar u korodha mooyee, bari kama dhicin.

Balayax iyo Sukhra, marka ay sheekaysanayaan ama wadahadlayaan, waxay

isdhaafsan jireen weedho macmacaan oo ay tiraabtoodu malabka ka dhadhan

macaantahay. Waxa uu midba midka kale u hibbayn jiray dhegaysi aan qiyaas lahayn iyo dhugmo aan eray qudhi dhaafayn. Waxay isu xullan jireen erayba erayga uu ka debecsanyahay, kana luq-mad-wanaagsanyahay.

Wuxuu midba midka kale kala tacaali jiray kelmad kasta oo laga urin karo dhadhamo xajiin leh. Balayax, ma lahayn, wax balwad ah, Sukhrina waxa balwad u ahaa boholyowga iyo jacaylka Balayx, sidaa darteed markii ay muddo saddex bilood ah, guri lahaayeen ayey labadooduba qalbiga iyo jidhkaba ka dhogorgooyeen, oo sida cadceed subax joogta u widh-widheen.

Qof kasta oo hore u yaqaanay, markuu arko wuu la yaabaa, wuxuuna ku murmaa “ma iyagii baa, mise waa kuwo u eg”. Balayax iyo Sukhra, inkasta oo ay ku soo kala koreen labo bii’adood oo aad u kala duwan, dhaqankooda

nololeedna kala fogaa, hadana arintaasi marna saamayn kuma yeellan hab dhaqankooda nololeed, mucaamilkooduna habayaraatee ma yeellan wax surmo

seegto ah iyo isfahmi waa, midna.

Macaamilka nololeed ee Balayax iyo Sukhra, goldaloolo iyo turxaan kasta goldaloola oo meesha iman lahayd, asturaad iyo bilixijaab u noqday ama isku gudbay mahiigaanka jacaylka ee qalbigooda biyo dhigay iyo baaranimada caqliga weheshanaysa ee labadoodaba Ilaahay u khalqay, taasina waa nasiib wanaag aanay barbaarta aduunku, badiba calafsan.

Sukhra, markuu fasaxii ka dhamaaday ayey shaqo tagtay, waxayna ku hawlgashay dareen aad u xasiloon iyo jawi xanbaarsan firfircooni saayid ah. Markii ay Sukhri shaqo tagtay, Balayax laftiisu isuma dhigin nin meel iska fadhiya oo ay gabadhi u soo shaqayso, ee wuxuu noqday nin halganka nolosha dhiniciisa ka soo dhalaala, oo aan baylihi agtiisa oolin. Balayax, makhaayad shaaha iyo cuntada lagu kariyo oo afar irdood ah, ayuu ka furtay magaalada Dirirdhabe, taasina waxay keentay inuu qofba geestiisa uga dedaalo dhismaha iyo quruxda qoyskooda, waxayna noqdeen qoys, qurux badan oo turxaanta iyo qodxaha ka ilaaliya halgankooda nololeed iyo habdhaqanka jacaylkooda aqal galay.

Balayax, wuxuu noqday nin meheradiisa ka soo dhalaala, macaash
badanna
wuu helay, wuxuu noqday nin macaamiisha iyo dadka wax ka iibsanaya
kula
dhaqma akhlaaq wanaagsan iyo eray debecsan oo dareenka dadka soo
dhoweeya. Isla markaana wuxuu ahaa nin aan shaqadiisa ka hawl-hawlin
oo
xilkasnimo ku guta, xaragona ku dhamaysta.

Mudooyinkii dambe ee ay dadkii dagaalada ku barokacay iyo dalkii
ciidamadii Siyaad Barre, xaaladda qaxootinimo ku sugnaayeen, waxay
Balayax iyo xaaskiisu ku jireen ayaamo xiiso leh, oo ay quruxda
noloshuba kow u tahay, farxadina agtooda taal. Waayo waxay ku
qanacsanaayeen guusha guurkooda, sanad iyo badh markii la joogay
aqalkii
Balayax iyo Sukhra, ayuu Balayax, maalintii dambe idaacadaha ka
maqalay
inuu dalkiisii laga saaray ciidamadii naxariista darraa ee uu carigiisii
hooyo uga caagay.

Balayax, isaga oo weli magaaladiisii Dirirdhabe degan, si wanaagsanna
uga ceeshaya, ayey maalintii danbe ugu yimaadeen qaxootiyadii ciidamadii
Siyaad Barre iyo xaasaskoodii. Balayax, oo goor galab ah, rushaynaya
meheradiisa horteeda ayaa isha ku dhuftay gabadh aad u diifaysan, oo
shan caruur ah dallandalsanaysa, aabahoodna barbar luudayo.

Dadkaas oo Hargeysa ka soo qaxay, waxay soo galeen dukaan dahable
ah, oo
makhaayadda. Balayax ku qabsan. Gabadhu waxay xanbaarsan tahay ilmo
yar
oo aan afartan bixin, waxayna doonaysaa inay dahablaha fargal ka
xaraashto oo ay caruurta caano iyo biyo ugu iibiso. qaar ka mid ah,
caruurta, gaar ahaan kuwa da'da yaryar ayaa macaluul iyo gaajo la
ooyaya, waana qoys darxumo badani ka muuqato.

Balayax, ayaa qoyskan darxumaysan aad u eegay, wuuna gartay inay

yihiiin

qaxootigii cusbaa ee Hargeysa ka soo barakacay dhowaan. Balayax, oo aan

weli ka sii jeesan qoyskii qaxootiga ahaa, oo isha la sii raacaya ayey ruuxii dumarka ahayd, ee ilmaha yar xanbaarsanayd soo eegtay dhinicii Balayax. Ka dibna Balayax oo ku fooraray rushaynta iyo fiiq-fiiqidda meheradda horteeda ayaa kor u eegay qofkii dumarka ahayd, saa waa qof uu

wejigiisa aad u garanayo. Dabadeedna aad buu uga ilsugtay, saa wuuba gartay, oo waxay noqotay gabadhii Cudbi oo ay isugu dambaysay afar sanno

ka hor iyo ninkeedii kornayl Sayruukh oo Hargeysa qaxootinimo iyo cago caddaan kaga soo baxay. Balayax markuu habsaday inay Cudbi tahay ayuu

dhawaaqay oo yidhi “Naa Cudbi” ka dibna Cudbi oo aad ugu oommanayd, qof

indho garad ah ayaa eegtay saa waa Balayax. Dabadeedna way ku soo dhaqaaqday, ka dibna si diirran oo dareen kal gacayl iyo xusuus leh ayaa la isu gacan qaaday. Ninkii Balayax, qoyskii Cudbi si wanaagsan buu u soo dhoweeyey, wuxuuna kuligood fadhiisiyey gudaha meheradiisa, wuxuuna

siiyey cunto iyo cabitaan degdega ah, si uu nafta ugu soo celiyo.

Gabadhii Cudbi ee madluumka iyo xaaladda yacsumman ku jirtay, niyadeeduna dharaska ahayd, farxad bay la kala badatay, waxayna aragtida

Balayax u noqotay, sidii ay heshay walaalkeed rumaad. Markii ay qoyskii qaxootiga ahaa yara nefiseen, ee ay waxna dhadhamiyeen, waxoogaana nasteen, ayey Cudbi isbartay Balayax iyo ninkeedii, waxayna hadalkeeda ku bilowday “Balayax ninkan aan iskiin baro’e waa ninkaygii” hadana ninkeedii bay ku tidhi “inankani waa inaadeerkay, waana wiilkii aad berigii dilka ka sii daysay”. Intaa ka dib, Balayax iyo Cudbi ninkeedii si fiican bay isu gacan qaadeen.

Cudbi iyo ninkeedu waxay Hargeysa kaga soo baxeen kabo la’aan, afar caano maalna oomatiyi kama degin. Hantina waxa mood iyo noolba u ahaa fargalkii ay doonaysay inay dahablaha ka xaraashto, ta kale Dirirdhabana

cid kuma ay ogayn ee nafta ayuun bay ula soo carareen, sidaa darteed, hadii ay fargalkii habeen caruurta ku seexiyaan, wixii ka dambeeya meel ay u irkadaan may garanayn, waxayna ka baqayeen inay gaajo ule'daan. Balse nasiib wanaag waxay Cudbi heshay Balayax, oo ay awooddiisa dhaqaale u saamaxayso inuu wax taro, abaalna ay ku lahayd. Xusuusta waayihii ku soo maraa, waa shay lama huraan ah, sidaa darteed Cudbi waa

gabadhii ay Balayax is jeclaayeen ayaamu minasamaan, ee ay baadiye is kala soo haajireen, balse raafka iyo cududda lagu kala irdheeyey, aakhirkiina guursatay sarkaalka.

Cudbi, waa gabadhii uu Balayax gurigeeda horyimi, isaga oo u boholyoobaya, balse intay ogaan ugu badheedhay, albaabka ka xidhatay. Waxaase Balayax xusuustaa aan qalbiga u wanaagsan, ka masaxay abaal kale

oo ay Cudbi u gashay maalin maalintaa ka dambaysay. Waayo Cudbi, waxay

Balayax xumaantii iyo uurxumadii maalinta hore u gashay kaga baanatay, ka dib markii ay naftiisa ka badbaadisay geeri, ee ay weliba intay aad ugu muctaadday ku booqatay xabsiga, aduunkana ugu gaysay, isaga oo aan

filayn ehel xabsiga ugu imanaya.

Balayax, intuu qoyskii qaxootiga ahaa kaxeeyey ayuu gurigiisii geeyey, ka dibna u sameeyey casuumad la yaab leh, isaga si xushmad leh u qaabilay.

Balayax, wuxuu isbaray xaaskiisii Sukhra iyo qoyskii martida ahaa ee soo qaxay. Isaga oo u sheegay inuu qoyskani yahay qoyskii dilka ka badbaadiyey. Cudbi, ninkeedii kornayl Sayruukh oo ay ka muuqatay xanaftii iyo cabsidii dagaalku, ayey waxoogaa niyaddu u yara qabowday. Waxaan maqli jiray, taariikhdu marbay libaax kaa dhigtaa, marna way ku naab-naabtaa, sidaa darteed, waxay ahayd wax lagu cibro qaato, ayaamaha

isu bedelay nolosha kornayl Sayruukh iyo sida uu maalintaa ula kulmay wax aanu qorshahaba ku darsan, ninbaa laga hayaa (labo kasta isa saarayoo, weli labo tagoogo isma saarin).

Kornayl Sayruukh, wuxuu ahaa ninkii qallinka ku duugay ee saxeexay xukunkii dilka ahaa ee Balayax iyo saaxiibediisii aan iyagu badbaadin. Kornayl Sayruukh, wuxuu ahaa ninkii hadana Balayax ka badbaadiyey dilka,

isaga oo iska aamusiinaya baroorta ooridiisa, kornayl Sayruukh, markii uu Balayax dilka ka badbaadinayey oohinta Cudbi iskaga jooji mooyee, isma lahayn cid kale ugu xeer dhigo, waayo marna muu filayn, sheekadana kuma darsan waxaad muddan doontaa Balayax. Hadiise maalintaa lagu darilahaa 22-kii nin ee la dilay, maanta Cudbi iyo ninkeedu, may heleen cid-away ugu noqota Dirirdhabe oo way ku qadi lahaayeen.

Balayax, hadii aanu Sukhra qabin ma xil baxeen oo Dirirdhabe cidna kuma casuumi kareen.

Balayax, iyo Sukhra, way isu taageen qoyskii Reer Sayruukh, waxayna u galeen si gobanimo leh, waxay dejiyeen qolal gurigooda ka mid ah, waxay siiyeen lacag, waxayna u iibiyeen dhar.

Cudbi, iyo ninkeedu waxay sheegeen inay doonayaan Kenya, si ay uga qayb

galaan xeryo qaxooti oo laga qorayo meesha la yidhaahdo xagar dheer oo dalka Kenya ka mid ah, ka dibna Balayax iyo ooridiisii Sukhra, waxay Reer Sayruukh u diyaariyeen sahaydii ay ku meel mari lahaayeen, waxayna

siiyeen kharash wanaagsan oo ay ku jid maraan. Reer Sayruukh, hal toddobaad bay marti u ahaayeen Reer Balayax, dabadeedna maalin sideedaadii ayey u baqooleen dhinaca Kenya, waxaana la saaray gaadhi u socda jiidda xagar dheere, sidaa ayeyna isku macasalaameeyeen labadii qoys.

Balayax iyo Sukhra, waxay noqdeen qoys ku noolaada nolol xiiso leh, waxay noqdeen qoys jacaylkoodu aanu debec lahayn, waxay caado u lahaayeen inay had iyo goor dhegaystaan heesaha Maxamed Mooge iyo maansooyinka Maxamed Ibraahim (Hadraawi) iyo Maxamed Xaashi (Gaariye).

Sukhra iyo ninkeeda Balayax, waxay ku noolaayeen neecow macaan iyo nolol xiiso leh.

Balayax, iyo Sukhra, waxa iigu war dambaysay iyaga oo sannadkii 1991-kii weli degan magaalada Dirirdhabe, oo wax u siyaada mooyee aanay noloshoodu hoos u dhicin.

Balayax iyo Sukhra, marna jacayl kama duugoobin, nololna kuma cidhiidhyoomin, balse ogaantay ubad isuma dhalin.

Qalinkii: Axmed Cali Garas (Maqaloocshe)